# Arimaha Ka Taagan Soomaaliya Maxaa Xal U Ah?

فضيلة الشيخ الدكتور
عثمان حفظه الله
معلم محمود
Sheekh Dr. Cuthmaan Macallin

# Tusmada kitaabka

**1-Hordhaca. Bogga 3d.**

**2-Gaaleysiin gardarro ah. Cismaan Macallim Maxmuud. Bogga 4d.**

**3- Hufidda iyo barbaarinta. Sheikh Muxammad Naasiraddiin Albaani. Waxaa tarjumay: Cabdirisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa" (bogga 11d).**

**4-Caqiidada ahlusunnada waxaa ka mid ah inaan lala dagaallamin Madaxda Muslimiinta. Turjume: Cabdirisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa" (bogga 16d).**

**5- Mushkiladeennu ma madaxdeennaa? Sheekh Albaani. Tarjume: Cabdirisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa" (bogga 18d)**

**6- Xalku ma xabbad baa mise waa xaalid. Mashaayikhda salafiyiinta soomaaliyeed. (bogga 27d).**

## Su'aalo ku saabsan waaqica maanta jira

## Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud.

- **a- ahlu sunnuhu maxay ka aamminsan yihiin mas'alada ah in la adeeco ninka madaxweynaha ama amiirka ah?. (bogga 34d).**
- **b- Maxaa u dhexeeya jihaadka iyo fitnada? (bogga 42d).**
- **c- shabaabka ma taageeri karaa? (bogga 46d.)**
- **d- xisbi in la sameeyo si khilaafadi loo soo celiyo ma bannaan tahay? (bogga 48d).**
- **e- Calanka madow ee ay isticmalaan al shabaab ma sunnaa oo nabigu calanka uu dagaallada u qaadan jiray madow miyuu ahaa? (bogga 52d).**

**Xukunka islaami la raadinaayo maloo Mari karaa waxkasta oo xalaal iyo xaraanba ah?. Haddiise meeshii loo soo carari jiray laga cararo xaggeen u cararnaa? (bogga 55d).**

# 1- Hordhaca

Kitaabkan yar waxaan ku ururiyay jawaabo waqtiya kala duwan aan ka jawaabay su'aala la i weydiiyay, waxaanan is iri baahidi loo qabay weli waa ay taagan tahay, waxaana dhici karta in Alle ku anfaco addoommadiisa qaarkood, oo ay saxaan dariiqa ay ku socdaan.

Aniguna waxaan Allaah weydiisanayaa in uu iga aqbalo wixi aan soo bandhigay.

Jawaabaha ka sokow waxa aan soo gudbiyay saddex maqaal oo sheikh Albaani leeyahay, oo uu tarjumay walaalkeen Cabdirizaaq Maxamad Cilmi (ina warfaa), kheyr Allaha siiyee. sixsixid yarna waan ku sameeyay. Waxaa kale oo ku jira maqaallada ka lagu magacaabo: "xalku ma xabbad baa mise waa xaalid", oo ah bayaan ay soo saareen mashaayikh salafiyiin ah oo Makka ku kulmay xajki dhowaa kii ka horreeyay, cilmi badanina ka buuxo, oo daawo u noqon kara dhibka Soomaali heysta.

Waxaanse ku billaabay maqaal ka hadlaya gaaleysiinta xaqdarrada ah.

Qofki qaldama in la qabto xaq ayuu noogu leeyahay, sidoo kale in loo caddeeyo meesha qaladku ka yimid waxa ay ka mid tahay isu naseexaynta muslinka ka dhexeysa.

Alle wuxuu noo sheegay reer banii israa'iil waxa naxariista Alle looga fogeeyay in ay ahayd xumaanta oo aanay iska celin.

Sidoo kale haddaanay jirin dadka Alle u soo bixiyo in ay bidcoolayaalka raddiyaan diintu waa ay fasaadi lahayd, fasaadkaasina waa uu ka darnaan lahaa kan cadowga dhulkeenna dibadda uga yimaada, sababta oo ah cadowga gaalka ahi billowga hore dadka qalbiga kama weeraro, ee waa ay danbeysaa fasaadinta uu fasaadinayo diinta, bidcoolayaalkuse billowga horeba qalbiga ayay fasaadiyaan. Fiiri fataawada Ibnutaymiya (28/231-232).

Ibnutaymiya waxaa kale oo uu yiri: nimankaa in diinta laga difaaco, oo jidka Alle laga sifeeyo xadgudubkooda waa xil ummadda wada saaran oo haddii qaar ka mid ahi u istaagaan fardu kifaayuhu ka dhacaayo.

Gabagabada hordhacan waxaan u mahad celinayaa Allaah, ka dibna dhammaan walaalaha iga saaciday risaaladan in ay soo baxdo, waxaanan si gaar ah ugu mahad celinayaa walaalkey Cabdilqaadir yaasiin oo laba fatwo iyaga oo cod ah u beddelay qoraal, sidoo kale walaal Khadar xasan axmad oo lahaa tarjamada bayaanki culimada salafiyiinta. Sidoo kale walaal Cabdirizaaq Maxamad Cilmi (ina warfaa), oo maqaallo muhim ah oo uu tarjamay aan ka soo qaadannay, sidoo kale walaal Naasir cadceed oo ah mas'uulka maktabada.com

Walaalkiin/ Cismaan Macallim Maxmuud
Medina, Sacuudi Carabiya
Khamiis, 13/2/1431 hijriga, waafaqsanna 28/1/2010.

# 2- Gaaleysiin gardarro ah

Mushkiladda maanta jirtaahi waa gaaleysiinta muslinka, ka dibna dhiiggooda la banneysanayo.
Muslinka oo la gaaleysiiyo kitaabka iyo sunnuhu aad ayay uga digeen.
Alle wuxuu yiri:

يا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِذَا ضَرَبْتُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَتَبَيَّنُوا وَلَا تَقُولُوا لِمَنْ أَلْقَى إِلَيْكُمُ السَّلَامَ لَسْتَ مُؤْمِنًا تَبْتَغُونَ عَرَضَ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا فَعِنْدَ اللَّهِ مَغَانِمُ كَثِيرَةٌ كَذَلِكَ كُنْتُمْ مِنْ قَبْلُ فَمَنَّ اللَّهُ عَلَيْكُمْ فَتَبَيَّنُوا إِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا (٩٤) من سورة النساء.

Ibnu jariir dabari aayaddan markuu fasiraayay wuxuu yiri: dadyahow Alla rumeeyow, Rasuulkana u rumeeyay wuxuu Alle xaggii uga keenay: Haddii aad u baxdaan jihaadka cadowga Alle wax kala caddeysta, oo ha ku degdegina dilka qof aad ka shakideen oo aad kala garan weydeen islaannimadiisa iyo gaalnimadiisa, hana dilina qof aadan hubsannina inuu dagaal ku yahay Alle iyo Rasuul iyo adinkaba. Islaannimadana ha u diidina qof idiin hoggaansamay oo aan idinla dagaallamayn, idiinna muujiyay in uu diintiinna ku jiro. Ha u dilina idinka oo doonaya adduunyo, Allaa ganiimooyin iyo risqiba idiin haya, ee Alle agtii ka raadiya idinkoo kaalmeysanaya inaad adeecdaan. Idinkuba sidaasaad islaamkiinna u qarineyseen inti aan Alle diintiisa kor u qaadin oo cizeyn. Waxaa kale oo la yiri: idinkuba marki hore gaala ayaad ahaydeen markaas ayaa Alle idin dhaqaaleeyay oo badiyay dadki diinta u gargaarayey. Waxaa kale oo la yiri:Alle wuxuu idinku galladaystay in uu idinka towbad aqbalay dilki aad disheen ninkan islaannimada muujistay, ee wax kala caddeysta, waxaa dhici karta in asagana Alle ku galladaystay islaamka sida idinkaba uu idinku galladaystay oo uu ku hanuuniyay iimaankii. Allana wax walba oo aad sameyneysaan hoos ayuu u og yahay, kaasuuna aakhira idinku abaal marinayaa, kii xumi hormarsada iyo kii wanaag geystaba.
Axaadiiththi gaaleysiinta ka digaysay waxaa ka mid xadiithkii bukhaari (6103) abuuhurayra ka weriyay in Rasuulki Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) uu yiri: Haddii qof uu walaalkii ku yiraahdo gaalyahow, labadooda mid ayaa la noqda.
Bukhaari (6104) iyo muslim waxay ibnicumar ka weriyeen in Rasuulki Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) uu yiri: Haddii nin uu walaalkii ku yiraahdo gaalyahow, midkood ayaa la noqda. Haddii uu noqdo sidaa uu ku sheegay waa meesheeda, haddii kalese isaga ayay ku soo noqonaysaa gaaleysiintu.
Bukhaari (6105) wuxuu Thaabit ibn daxaak ka weriyay in Rasuulki Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) uu yiri: … Qofkii mu'min gaalnima ku gema isagoo dilay ayay la mid tahay.
Gaaleysiintuna waa xukun sharcicga Alle ka tirsan, qof aan Alle iyo Rasuul gaaleysiin lama gaaleysiin karo.
Gaaleysiintu waxay ka mid tahay gooddiga Alle iyo Rasuulku noo sheegeen. Si guud waad u dhihi kartaa: qofki waxaa sameeya waa sidaa iyo sidaa, laakiin marka ay noqoto in qof cayiman la xukumo kuuma furna arrintaasu haddii aanay shuruuddi gaaleysiintu dhammeystirnayn, jiraanna wax ka hor imaanaya xukunkaas. Bal u fiirso aayaddan:

(إن الذين يأكلون أموال اليتامى ظلماً إنما يأكلون في بطونهم نارا وسيصلون سعيرا)

Kuwa xoolaha agoonta dulmi ku cuna naar bay calooshooda ku gurayaan, ama gelidda naarta ayay wixii keeni lahaa la yimaadeen. naarta saciira ee holaca badanna way geli doonaan.
Waxaad aragtay nin xoolo agooneed cunaya ma kuu furan tahay in aad ku tiraahdo naarti ayaad geleysaa qof ahaantaa?. Kuuma furna, sababta oo ah arrinkaa waxaa lugu magacaabaa: gooddigi oo qof gooni ah lugu sugo. Iyada oo ay dhici karto in uu toobad keeno, waxaa dhici karta in uu sameeyay wanaag fara badan oo qariya danbigan, waxaa dhici karta in dhibaatooyin adduun ku dhacaan oo danbigi looga tirtiro, waxaa kale oo dhici karta in aanay soo gaarinba in waxani ka xaaraan yihiin.
Taa waxaa la mid ah hadallada iyo falalka gaalnimada keena, waxaa dhici karta in qofki aanay soo gaarin daliilladi tusinaayay in uu xaqi garto, waxaana dhici karta in ay soo gaartay laakiin aanay agtiisa ka sugnaan, ama aanu awood u yeelan in uu daliilki fahmo, ama shubhooyin ku furmeen Alle ugu cudur daarayo.
Lamana dhihi karo mas'alooyinka qaar waa qadci, kuwaas ayaanna qofka ku gaaleysiineynaa, maxaa yeelay arrintaasi waa arrin is bedbeddelaysa, oo hadba sida loo fiiriyo ku xiran, iyo dhinaca laga fiiriyo. Qof ayay mas'aladu agtiisa qadci ka noqon kartaa, oo Rasuulki ayuu toos uga maqlay, ama daliilki iyo wixii uu tusinaayay ayaa u caddaaday. Qof kalana in ay agtiisa qadci ka tahay iska dhaafe malana ma gaarto, oo daliilki ayuusan maqal, ama agtiisa kama sugnaan, ama sida uu wax u tusinaayo daliilku ayuusan fahamkeeda awooddeed lahayn.
Waxaa ku sugan xadiith saxiix ah, in nin uu wiilashiisa ku yiri: "haddii aan dhinto I guba, lafahaygana shiida, ka dibna badda igu bitiya. Alle ayaan ku dhaartaye haddii Alle I awoodo, cadaab aanu qof kale cadaabin ayuu I cadaabayaa, markaasaa Alle dhulki ku yiri soo celi wixi aad ka cuntay, Ninkina ku yiri: maxaa kugu bixiyay waxa aad sameysay?. Wuxuu yiri: Allow waxaa igu bixiyay cabsi aan kaa cabsaday. Markaas ayaa Alle u danbi dhaafay". Bukhaari iyo muslim ayaa abuuhurayra ka weriyay. Ninkani waxaa muuqata in uu ka shakiyay awooddi Alle in wax waliba soo hoosgelayaan, sidoo kale wuxuu ka shakiyay in la soo celinayo haddii sidaa lugu sameeyo, oo wuxuu u maleeyay in aan la soo bixinayn, Allana awood u lahayn hadduu sidaa sameeyo. Markaasaa Allana u dhaafay.
Xadiithkaasi waxa uu ku tusinayaa in qofkii muslin ah ee xerada soo galay aanu ku xukun ahayn qof aan xeradaba soo gelin, oo ka muslinka ah jahliga loogu cudur daarayo.
Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu u cudurdaaray raggii ku yiri: daatu anwaad noo same, sida gaaladuba geedkaas oo kale u leeyihiin? (waa geed la ag hogto, oo ay ka arkeen mushrikiinta oo sameynaya) Wuxuuna ku yiri: waxaad ku hadasheen hadalki yahuudda oo kale ay Muuse ku yiraahdeen: ilaah noo samee sida ay iyaguba ilaah u leeyihiin.
Xadiithki citbaan ibn maalik ee bukhaari (425) iyo muslim (33) weriyeen, markii uu nabigu gurigiisa ku tukaday, ee rag xaafadda ka aga dhowaa gurigi yimaadeen ayaa mid dadki ka mid ahi yiri: aaway Maalik ibn dukhshum? Markaas ayaa kuwa kale u jawaabeen oo yiraahdeen: waar kaasi waa munaafiq aan Alle iyo Rasuul jeclayn. Nebigaa wuxuu yiri: sidaa ha dhihin, miyaadan arag in uu laa'ilaaha illallaah yiri isagoo Alle ula jeeda? Wuxuu yiri: Alle iyo Rasuul ayaa ku cilmi badan. Annaguse Alle ayaan ku dhaartaye waxaan aragnaa in uu jaceylkiisa iyo sheekadiisuba xaggaa munaafiqiinta kaliya u jeedaan. Markaas ayaa Rasuulkii yiri: Alle naarta waa uu ka xarrimay qofkii laa'ilaaha illallaahu yiraahda isaga oo Alle ula jeeda. Raggaa Maalik ibni dukhshum munaafiqa ku sheegay waa uu u cudur daaray illeen muta'awiliin ayay ahaayeene.

Ahlusunnaha iyo bidcoolayaashu waxay ku kala duwan yihiin fiirinta loo fiirinaayo qofkii gaalnimo ka dhacday in shuruuddi lugu gaaloobi lahaa laga helay, iyo in kale. Sidoo kalana wax ka horjoogsanaya aanay jirin xukunkaa ama caaridaya,.
Shuruuduhu waxay yihiin:

1- in uu cilmi u leeyahay waxa uu khilaafay, oo aanu jaahil ka ahayn.
2- qasad iyo doonisina jirtaa uu u qasday macnaha hadalka gaalnimada keenaya.

Wax ka hor imaanaya in xukunkaa lugu fuliyana aanay meesha jirin, sida:

1- jahli, oo aanu wixii uu khilaafay aqoon u lahayn.
2- Awilasho.
3- Gef , oo doonisi aanay jirin.
4- Qasbid, oo aanu khiyaar ba lahayn.

Tusaalayaalkoodana waa la yaqaan. Waxaana ugu horreeya hadalki Alle:

(وما كنا معذبين حتى نبعث رسولاً)

Annagu ma nihin kuwii qolo cadaaba ilaa aannu Rasuul uga soo dirno.
Haddaanay qofka soo gaarin faahfaahinta qaarkeed Rasuulku la yimid, waxay dhinacaa kala mid tahay iyada oo asalki Risaaladuba aanu soo gaarin qofkaa.
Aayadihi suuratul baqara ugu danbeeyayna Alle waa uu aqbalay ducadi muslimiinta in uu u dhaafo haddii ay wax illaawaan ama ay gefaan. Sidi ku jirtay xadiithki ibnicabbaas ee Muslim (125) weriyay.
Sidoo kale xadiithki aan soo dhaafnay, ninki ku yiri wiilashiisa markaan dhinto I guba. Waxaa kale oo jira haweeney zino ku dhacday waqtigi Cumar, xadkina aan laga oofin, gaalnimana lugu xukmin marki ay caddaatay in ay xukunki jaahil ka tahay. (sunan bayhaqi 8/238-239).
Xagga gefkana waxaa tusaale u ah ninkii faraxu ka batay ee yiri: Allow addoonkaygi ayaad tahay, Anna Rabbigaadi ayaan ahay, faraxi oo ka badbatay dartii ayuu la khaldamay.
Qasabkina waxaa ka hadashay aayaddi suuratunaxli 106:

( من كفر بالله من بعد إيمانه إلا من أكره وقلبه مطمئن بالإيمان )

Ibnujariir aayaddan sidan ayuu ku fasiray: Qofkii iimaan ka dib gaalooba,-kumana jiro kii lugu qasbay arrintaa, kuna dhawaaqay hadal gaalnimo ah, iyadoo qalbigiisu ku xasilan yahay iimaanka, dhab ahaanna u yaqiinsan, qalbigiisuna aanu gaalnimo u waasic noqon-, qofkiise gaalnimo qalbigiisu u waasic noqdo, sidaana gaalnima kaga doortay iimaanki, oo ku dhawaaqa gaalnimada iyada oo aan la qasbin, dadkaasi cadha Alle ayaa dushooda ahaatay, waxaa kale oo u sugnaaday cadaab weyn.
Axmad cabdilxaliim wuxuu yiri: qof gooni ah oo gaalnimo lugu xukumo, oo la yiraahdo dilkiisaa bannaan waxay ku xiran tahay in xujadi nabiga ka sugnaatay soo gaarto, taasoo qofkii khilaafaa uu xerada ka baxaayay. Illeen qof waliba oo qeyb diinti ka mid ah jaahil ka noqda ku gaaloobi mayee. Sidaa darteed markii Qudaama ibn madcuun iyo saaxiibbadii ta'wiilsadeen in khamradu dadka wanwanaagsan u bannaan tahay iyagoo ta'wiilsaday aayad suuratulmaa'ida ku jirta, waxay isku waafaqeen Cumar iyo Cali iyo saxaabadi kaleba in nimankaa la leeyahay waxan ka soo noqda, haddii ay ku madax taagaan xalaalaysiga waqtigaa ka dib gaalo ayay noqonayaan, haddii kalase xad ayaa laga oofinayaa. [al-rad calal bakri 258-260].
Wuxuu kale oo uu yiri: tuugmada awliyadu waa shirki Alle xaaraan ka dhigay, haddana sidaa oo ay tahay suurta gal ma ahan in muslimiintii arrinkaa lugula

gaalnimo xukmiyo ilaa ay uga caddaatao wax arrinkaa u caddeeya oo Rasuulka xaggiisa uga yimaada. Maxaa yeelay jaahilnimadi ayaa gaalib noqotay, waxaana ku yaraaday dadkii danbeeyay in ay cilmi u yeeshaan wixii Rasuulka laga dhaxlay ee diin ah.[al-rad calalbakri 377].

Ugalama jeedo erayadaa in aan ku soo koobo gaalnimo ku xugminta muslinka lugula kaco, oo waxay u baahan tahay kitaab dhan, ee waxaan ujeedaa baraarujin uun.

Xeerarka culimadu arrintaa ka sheegeen waxaa ka mid ah:

1- Qofki islaamnimadiisu sugnaato lagagama bixin karo shaki laga shakiyay, ee asalki ayaa lugu dhegganaanayaa.

2- Dadku waxay u qaybsamaan mu'min, kaafir, iyo munaafiq. Munaafiquna waa kan islaamka muujisanaya gaalnimase u qarsoon tahay, aakhiro naarta meesha ugu hooseysa ayuu ka gelayaa, adduunkase waxa uu muujistay ayaa lugu dhaqmayaa oo naftiisa iyo xoolihiisu ba waa naga xaaraan.

3- Qofka muslinka caasiga ah asalki xiriirinta muslimiinta waa uu heystaa, la dagaallanka qaar muslinki ka mid ah uu la dagaallamayo islaanki uga bixi mayo sidi aayaddi xujujuraat sheegtay. Naar ayuuse ku mutaystaa danbigaa kabiirada ah, haddaanu ka toobad keenin. Sidoo kale qofkaa muslinka caasiga ah wuxuu heystaa asalki ka beri noqoshada gaalada, haddii uu mar mar khaldamo oo gaaladi weli ka dhigto asalkii berinnimada ku waayi mayo taas. Laakiin hadduu gaalada u jeclaado diintooda darteed ama uu jecleysto in gaalnimadu ka guuleysato islaannimada markaa diinti waa uu ka baxayaa, sida laga faa'iideysanayo xadiithkii Xaadib ibn abii baltaca ka hadlaayay.

4- Haddii aad aragto aayado iyo axaadiith iimaanki u diidaaya dad danbiyo ku dhacay, waxaa laga fahmayaa in dadkaasi waajib ka tageen, dad xunna yihiin, laakiin loolama jeedo xeradi ayay ka bexeen. Maxaa yeelay aayada farabadan iyo axaadiith iyo ijmaaci culimaduba waxay caddeeyeen in aanay isku mid ahayn munaafiq aan Rasuulka hoos ka rumeysneyn, iyo muslin danbaabay. Hadduu qofku danbiyada waaweyn xerada uga baxayo xuduud lama jideeyeen, ee qofki zina ku dhaca ama wax xada waxaa la dhihi lahaa waa riddoobay ee ha la dilo. Taasina ma dhicin.

5- Murtad haddii la dilayo ama murtaddiin lala dagaallamayo waa arrin dowladeed, waa gardarro in ay dad keli keli ah ama kooxo ay arrinkaa sameeyaan.

6- Rasuulka (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) waqtigiisi xad aanu oggolaan lama fulin. Khulafadi ka danbeysayna sidoo kale ayuu arrinku ahaa. Dowladihi islaamkuna sidaas ayay ku dhaqmi jireen. Fuqahadi islaamku waxa ay wada caddeeyeen in xuduud oogidda iyo jihaadkaba madaxdi looga danbeeyo.

7- Waxaa dhici karta qofku in uu yiraahdo oo haddii wax u istaaga arrimahaas aan la helin ma la wada fadhinayaa? Jawaabtu waxay noqonaysaa: haa, oo dhibka ka dhalanaya waxaa la sameynayo ayaa ka weyn wanaagga laga fili karo.

8- Salaad aan waqtigeedi gelin hadduu yiraa qofku waan tukanayaa, oo waxaan ka baqayaa in fadligeedi I dhaafo ama aan ka soke dhinto Ma laga aqbalayaa. Xuduud oogid iyo jihaad aan shuruuddiisi dhammeysneynna waa sidaas oo kale. Ee qofku ha ku mashquulo wax uu awooddeed leeyahay, xalaalnimadeedana hubo.

9- Ha la saaxiibin dad aan la hubin aqoontooda diineed iyo saxnimada dariiqa ay ku socdaan. Maalin ba xoogaa quraan ah baro, axaadiith baro, sheikh wax fahansan ka aqriso, adigu wax ha isu aqrin, video iyo baro aan lugu kalsoonayn oo internet ahna fatwo iyo masaa'il waaweyn ha ka goobin.

Wax kasta oo la bartana ama fadligooda la ogaado hore loogama dhaqaaqi karo: is weydii yaa howshan u xilsaaran, haddii la sameeyase maxaa ka dhalanaya.

Qofkii salaad kushuuc wadata tukada, habeenki xoogaa ka qaata oo salaad tukada xuska Alle iyo baryadiisana badiya, dad wanaagsanna diinka ka akhrista. Haddii adduunyo xil saaran yahayna si xalaal ah u goobta masruufkiisa, intaasi mashquul waa ay ugu filan tahay.

Adduunyadu waa imtixaan, adiga oo ribix iyo faa'iido raadinaya ra'samaalkaadi yaanu kaa guban, oo islaannimadaadi Qatar gelin, markaad dhex dabaalato gaaleysiinta muslimiinta iyo in dhiiggooda la fududeysto. aakhirana hoggaamiyaha ururku xisaabintaada kuu iman mayo, oo qof walba xigtadiisi waa uu ka cararayaa, oo tiisa ayuu ku mashquulsan yahay, sida Alle aayada kala duwan noogu sheegay. Sa'ala iyo cabasa ka fiiri macnahaas.

Arrinta ku saabsan in wax lugu gaaleysiiyo ururro caalami ah oo laga mid noqdo sida ummadaha midoobay oo kale ma ahan mid laga fiirsaday. Maxaa yeelay dulmi badan iyo kufri badani haba ku jiree, ma ahan wax ay leeyihiin waxaan u sameysannahay in aan gaalnimo faafinno, ama masaakiinta dilno oo dhacno.

Asalkeedi wuxuu ka soo jeedaa dowlada xoog leh oo kuwa kale ka adkaaday, diintooduna kala duwan tahay ayaa ku heshiiyay oo yiri: nabadda guud ee adduunka ayaan iska kaashanaynaa, danahooda ayay dabcan hor marinayaan, adduunki kalana ma jirin tabar lugu yiraahdo waxaa aad dhoodhoobteen shaqaba kuma lihin, oo dowladaha muslinku qaarna gumeysi ayey ku jireen, qaarna xor ayay ahaayeen. Kuwa xorta ah waxaa ka mid ahaa sucuudiga waa ay ka qayb gashay, waxayse farta ka taagatay qodobka leh qof walba xor buu u yahay in uu diintiisa beddelo.sidoo kale waxay ka hor timid in gaal guursado gabar muslimad ah. Waraaq cad ayayna ka direen labadaas arrin iyo kuwa kaleba. Heshiis yada qaarna dowladuhu kuma qasbana, sida in lugu garnaqsado Maxkamadda dowliga ee Laahaay.

Heshiisyada qaarna waxaa dhici karta in laga indhallaabto iyada oo la fiirinayo in la iska difaaco dhib ka weyn, oo midka yar loo dulqaato, taas macnaheeduna ma ahan in aad macsi ama gaalnimo ku raalli noqotay. Munkarka inkiriddiisa darajo waxaa jirta qalbiga uun aad wax ka inkireyso, haddii ay awooddaadu intaa dhaafi weyso, kumana ceebeysnid, ee waxaa ceebaysan qofki kugu ceebeeya rukhsadaa Alla ku siiyay. Waxaan ku soo ebyayaa qormadan arrinta calanka ku saabsan in kasta oo aan hore uga jawaabay, gudaha kitaabkana aad ka akhrisan doonto, laakiin waxyaabo ayaa soo kordhay ka hadlid u baahan.

# Calanka dadka lugula dagaallamayo

culimadu waa ay sheegeen in ay sunno tahay calanka loo qaato jihaadka gaalada lugula jiro, laakiin inti aan baarbaaray weli iima soo bixin iyagoo leh: midab hebel ayaa sunno ah, xukun aan lagaaga horreynna waa khatar, in magaalooyinka muslinku deggan yahay calan la suro, midabka uu doono ha yeeshee iyadana ma arag culimadi axaadiithta sharaxday mid ka mid ah oo waa sunno yiri, haddaba kuwa yiri calankeenna qofki diida sunnadi ayuu ka hor yimid, dagaal ayaana noo dhexeeya, waxaa iiga muuqata arrin aan fiicnayn oo khawaarijta laga sheegi jiray, ahna wax bannaan in ay xaaraan ka dhigaan, wax aan sunna ahaynna sunna ka dhigaan, wax wanaag ah xumaan laga dhigo, wax xunna wanaag laga dhigo, intabana xiriirin iyo goyn laga dhaliyo, gaaleysiin iyo qoor goynna lugu bannaysto. Kii khawaarij u horreeyay wuxuu eex ku sheegay qaybinti Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye), kuwii Cali uu la dagaallamayna waxay gaalnimo ka dhigeen wax bannaan oo ah in muslinki dirirsanaa la kala dhexgalo

oo rag loo bixiyo kala xukuma. Ragga waqtigan jooga Soomaaliya haddii ay calan dad kula diriraan waxay noqonaysaa laba middood:

1) Calanka buluugga ah ee astaanta u ah dowladda soomaaliya tan iyo intii ay gumeysigi Talyaaniga iyo Ingiriiska ka xorowday, xukunkiisuna yahay in uu bannaan yahay haddii aan xumaan loola jeedin, ama aan wax lugu dulmineyn, caqiidda xunna laga aamminsanayn. Qofki yiraahda calankaa haddaadan dhigina dhiiggiinnu waa ii xalaal, ha la ogaado wax bannaan ayuu dhiig muslim ku bannaystay.

2) Calanka ay shabaabku wataan ee towxiidku ku qoran yahay, ama ha madoobaado ama ha caddaadee, in la yiraahdo qofki aan aqbalin dhiiggiisu waa uu noo bannaan yahay. Arrintaasina arrin sharciga waafaqsan ma ahan, sababaha soo socda awgood:

   a- Calan waxaa la qaataa marka jihaad gaalo loo baxaayo, soomaalidu ma gaalaa?.

   b- Calanka waxaa dhiiba Madaxweynaha, isagaana qaabilsan agaasimidda dagaalka iyo nabadda. Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) isagaa calammada dhiibi jiray, qofkii rabaa iskama qaadan jirin. Dagaalki Kheybar waa kii yiri: berri calanka waxaan u dhiibayaa nin Alla iyo Rasuul jecel yihiin ama wuxuu yiri: Alla iyo Rasuul jecel, markaas ayaa nin waliba u hanqal taagay, Cumar waa kii yiri maalinkaas kaliya ayaan madaxtinnimo jeclaystay, sababtana waa la fahmi karaa oo waa fadliga loo sheegay ninka calanka loo dhiibayo, ee si ahaanteeda uma jeclaan madaxtinnimada, sharcigana kuma fiicna in la jeclaado madaxtinnimada. Ka dib Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu u dhiibay Calankii Cali ibn abii daalib. Culimaduna way sheegeen in calanka arrintiisu tahay arrin hoggaamin iyo madaxtooyo xiriir la leh, oo madaxda looga danbeynayo. Xadiithki Bukhaari weriyay (lr.2976) waxaa ku jiray in Cabbaas ibni cabdilmuddalib uu ku yiri Zubeyr ibnil cawaam: ma halkan buu ku amray Rasuulku in aad ka taagto calanka. Waxayna ahayd maalintii la furanaayay Makka.

   c- Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu yiri: waxaa la I faray in aan dadki la dagaallamo inta ay laa'ilaaha illallaahu ka dhahayaan,

salaaddana ka tukanayaan, zakadana ka bixinayaan. Ma dhihin inta ay calan hebel ka oggolaanayaan. Haddii aad tiraahdo towxiidka ku qoran ayaan kala jeednaa. Jawaabtu waxay tahay, towxiidka in lugu hadlo ayuu qofku ku islaamaa, ee kuma islaamo in uu calan ku qorto. Iyadoo asal ahaanba xaafid ibnixajar alcasqalaani ka yiri xadiithka sheegay inuu ku qornaa calanki Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) towxiidku: waxaa lugu weriyay sanad aad u taag daran. Ka fiiri fatxul baariga 6/127.

d- Horana waxaan u soo sheegay in marka magaala muslin la deggan yahay qofki yiraahda calan taagiddu waa sunno looga baahan yahay daliil cad oo sheegaya arrintaa iyo fasiraaddii culimada. Haddii aan daliil la keeninna qofki waa sunno yiraahda bidco ayuu ku dhacay.

## *3- Hufidda iyo barbaarinta*

**Sheikh Muxammad Naasiraddiin Albaani.**
**Tarjume: Cabdirisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa".**

Walaalayaal waxaan halkan idinku soo gudbinayaa maqaalkan oo ka hadlaya:

**Xalka Soomaalida iyo Muslimiintu wuxuu ku jiraa:**

Ka sifeynta Diinta Islaamka wixii lagu soo daray التصفية

Iyo Muslimiinta oo lagu barbaariyo Diintooda siday ku soo dagtay والتربية.

Waxaana ka turjumay qoraal uu lahaa **al-Callaama sheekh Maxamed Naasirud-diin al-Albaani.**

Waxa uu yiri al-Callaama Sheekh Albaani Allaah ha u naxariistee isagoo la hadlaya Muslimiinta ku xiran Diintooda, gaar ahaan kuwooda dhalinyarada ah ee la socda ugu horreyn dhibaatada heysata Muslimiinta, marka xigtana isku taxallujiya sidii ay u badbaadin lahaayeen Muslimiinta.

Waxaan leeyahay Muslimiintaas: waxaa lagu badbaadin karaa Muslimiinta laba arimood oo kala ah:

التصفية: Waxaan kala jeedaa sifeynta: In loogu soo bandhigo dhallinyarada Muslimiinta Diintooda Islaamka iyadoo laga sifeeyay wixii lagu soo daray qarniyaalkii la soo dhaafay oo dhan; Haddii ay ahaan lahaayeen Caqiidooyin, Khuraafaad iyo Bidcooyin.

Waxyaabihii lagu soo darayna waxaa ka mid ah Axaaddiis aan sugnayn, ay dhici karto inay yihiin kutiri kuteen موضوعة, sidaas darteed waa lagama maarmaan ah in laga dhabeeyo Sifeyntaas, maxaa yeelay sidaas waxaa ku jirta badbaadada Muslimiinta.

Sifeyntan waxaa laga wadaa in la soo bandhigo daawada kaas oo ah Islaamka, kaasoo daaweeyay mid u eg dhibkan, markay Carabtu ahayd kuwaan awood lahayn oo ay caaabudi jireen sanamyada.

Annaga waxaan ku khilaafsannahay ururrada Islaamka oo dhan arrinkan, waxaanu u aragnaa waa in laga bilaabaa Sifeynta Diinta iyo in lagu barbaariyo Muslimiinta Diinta sidii ay ku soo degtay oo wada socda.

Ma inaan ku bilowno arimaha Siyaasadda miyaa, oo waxaa dhacda kuwa ku mashquulsan siyaasadda inaysan caqiidadooda toosnayn, oo waxaa dhacda hab dhaqankooda haddii laga eego xagga diinta inay ka fog tahay shareecada, iyo kuwa ka shaqeeya dadka iney iskugu keenaan urur, mana laha Manhaj cad oo la fahmi karo, sidaas darteed waxaad arkaysaa qaar badan oo iyaga ka mid ah noloshooda inuusan saamayn ku lahayn Islaamkaas ay had iyo jeer ku hadaaqaan, mana ku dhaqmaan Islaamka kuwaasi nafsad ahaantooda, waxayna isla markaasi kuwaasi kor ugu dhawaaqayaan waa in la isku xukumaa shareecada; waa oraah wanaagsan oo dhab ah, hase ahaatee **فاقد الشيء لا يعطيه** qofka wax uusan haysan ma siiyo cidna.

Ciladda ugu horeyso ee weyn waxay tahay: Iyagoo Islaamka u fahamsanayn faham sax ah, oo maxay sidaas u ahayn, waxaa ka mid ah ducaadda maanta kuwa u arka Salafiyiinta inay yihiin kuwo ku dhuminaya waqtigooda oo dhan Towxiidka, Eebbaha xumaanta ka hufnaayow, Alla muxuu aqoon daran yahay qofka sidaas oranaya, maxaa yeelay qofkaas wuxuu xasuusnayn ama uusan garanayn inay dacwaddii Anbiyada iyo Rususha ee sharafta lahaa ahayd ( **أن اعبدوا الله واجتنبوا الطاغوت** ) War dadow caabuda Eebbe kana dheeraada caabudidda wixii Eebbe ka soo haray, oo Nebi Nuux amaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee 950-kii sano ee uu waday dacwada ma uusan ugu yeeri jirin dadka wax Islaax ah, Shareeco ah iyo Siyaasad toonaba ee wuxuu dhihi jirey:

(**اعبدوا الله واجتنبوا الطاغوت**) caabuda Eebbe kana dheeraada caabudidda wixii Eebbe ka soo haray.

Sidaas darteed Nebi Nuux a.n.k. Islaax miyuu dadka ugu yeeri jirey? Mise in lagu dhaqmo shareecada? Siyaasad miyuu ka shaqayn jirey? Maya sidaas ma ahayn, ee wuxuu dhihi jirey kaalaya dadkeygow Eebbe caabuda wixii Eebbe ka soo harayna ka dheeraada. Nebi Nuuxna wuxuu ahaa Rasuulkii ugu horeeyay ee loo soo diro dhulka -sida ku soo aroortay Xaddiis Sugan- .

Wuxuuna waday dacwadiisa 950 sano mana ugu yeeri jirin dadka waxaan ka ahayn Towxiidka waana howsha ay Salafiyiinta waqtiga ku dhumiyaan sidee ayey ugu inkiri karaan qaar badan oo ka mid ah ducaadda Islaamiyiinta, waxayna gaaraan heer ay ku diidaan Salafiyiinta arinkaas.

التربية: Qeybta labaad ee Manhajkeenna waa in lagu Barbaariyo Muslimiinta

maanta, inaysan jiidan Adduunyada sidii ay u jiidatay kuwii iyaga ka horeeyay.

Oo Rasuulka amaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee ayaa wuxuu yiri: Saboolnimo idinkagama cabsanayo hase ahaatee waxaan idinkaga cabsanayaa in la idiin furo nolosha Adduunyada, oo ay idin galaafato sidii ay u galaafatay kuwii idinka horeeyay.

(( ما الفقر أخشى عليكم ولكن أخشى عليكم أن تُفتح عليكم زهرة الحياة الدنيا ، فتهلككم كما أهلكت الذين من قبلكم )).

Waana cudur ay tahay Muslimiinta inay iska ilaaliyaan, oo aysan gelin laabtooda

(( حب الدنيا وكراهة الموت )) In la jeclaado Adduunyada oo la naco dhimashada.

Sidaas darteed kani waa cudur ay tahay in la iska daaweeyo laguna barbaariyo dadka inay iska ilaaliyaan.

Xalkana wuxuu ku soo arooray dhamaadka Xaddiiska Rasuulka a.n.k. : (( حتى ترجعوا إلى دينكم )) ilaa aad dib ugu noqotaan Diintiinna. Xalkuna waa in

si sax ah loogu noqdaa Islaamka, Islaamka fahamkiisa saxda ah ee uu heystay Rasuulka Eebbe amaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee iyo Asxaabtiisa.

Eebbe Kor ahaaye wuxuu yiri: ( إن تنصروا الله ينصُرْكم ) Haddii aad Eebbe u gargaartaan idinkana wuu idiin gargaarayaa, waxayna Culimada Mufasiriinta ah isku raaceen in نصر الله macnaheeda laga wado: Haddii aad ku dhaqantaan Shareecada Islaamka. Haddii gargaarka Eebbe uusan ku dhaboobaynin in la oogo Shareecadiisa mooyee, oo sidee bay ku suurtagaleysaa inaan hirgelino Jihaadka, anaga oo Eebbe u gargaaraynin; Caqiidadeena aysan toosnayn, akhlaaqdeenu ay xun tahay, sidaas darteed waa lagama maarmaan ka hor inta aynan Jihaadin waa inaan toosinaa Caqiidadeena ka dibna nafta sidaas ku barbaarinaa, iskana ilaalinaa wax kasta oo khilaaf noo keenaya.

﴿ ولا تنازعوا فتفشلوا وتذهب ريحُكم ﴾ Ha is khilaafina oo dabadeed guuldarreysataan.

Oo marka aanu ka hortagno isqabqabsigaas oo aan ku beddelno midnimo; ayaannu ka dib la imaan karnaa awoodda maaddiga ah.

﴿ وأعدوا لهم ما استطعْتُم من قوة ومن رباط الخيل﴾ Oo u diyaarsada cadowgiinna intii aad kartaan oo awood iyo fardo xirasho ah.

**Akhlaaqda Muslimiinta ee barbaarinta waa mid xun, waxaana lagama maarmaan ah in laga Sifeeyo Diinta wixii lagu soo daray iyo in Muslimiinta lagu barbaariyo Diintooda sidii ay ku soo degtay, Islaamkana si dhab ah loogu noqdo.**

Alla maxaan aad ula dhacay arrinkan hadal uu ka yiri mid ka mid ah Ducaadda Islaamiyiinta, oo aan ka mid ahayn Salafiyiinta, hase ahaatee Asxaabtiisa aysan garanayn hadalkan:

(( أقيموا دولة الإسلام في قلوبكم تقم دولته في أرضكم )) .. Ku dhaqma nafsaddiina Islaamka si dadkana ay ugu dhaqmaan.

Sidaas darteed Ducaadda badankooda way ku qaldan yihiin markay hilmaansan yihiin mabda'eennaas, iyo markay leeyihiin: Waqtiga la joogo ma aha waqtigii Sifeynta Diinta iyo ku Barbaarinta Diinta sidii ay ku soo degtay, ee waxaa la joogaa xilligii is-uruursiga iyo is-kooxeysiga .. Oo sidee bay ku suurtagaleysaa is-uruursiga iyadoo la isku khilaafsan yahay Usuusha iyo Furuucdaba .. Waana wixii Muslimiinta kala dhantaalay awooddooda .. Daawada kaliyana waa tii aan horey u soo sheegay oo waa in si wanaagsan loogu noqdaa Islaamka saxda ah, ama in la hirgeliyo Manhajkeenna ah in laga Sifeeyo Diinta wixii lagu soo daray iyo Muslimiinta oo lagu Barbaariyo Diintooda sidii ay ku soo degtay.

Qore: al-Callaama sheekh Maxamed Naasirud-diin al-Albaani

Turjume CabdiRisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa"

# 4- Caqiidada ahlusunnaha waxaa ka mid ah inaan lala dagaallamin Madaxda Muslimiinta

### Turjume: Cabdirisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa"

Walaalayaal waxaan halkan idinku soo gudbinayaa maqaalkan oo ka hadlaya: Caqiidada **ahlusunnaha** waxaa ka mid ah inaan lala dagaalamin Madaxda Muslimiinta. Waxaana ka turjumay kitaabka caanka ah ee Caqiida ad-Daxaawiya sidaad ku arki doontaan maqaalka ee sidaas ula socda.

Haddaanu nahay Muslimiin waxaan u aragnaa inay waajib tahay inaan adeecno Madaxdeenna Muslimiinta, oo ay tahay annagoo adeecnay Eebbe Kor ahaaye, haddaysan na farin wax dembi ah, oo waa tii uu Eebbe yiri:

﴿أطيعوا الله وأطيعوا الرسول وأولي الأمر منكم﴾

Adeeca Eebbe oo adeeca Rasuulka iyo Madaxdiina idin ka midka ah. Umana aragno in lagu baxo oo lagu kaco madaxdeena Muslimiinta ah haba na dulmiyeene.

Kamana tagayno inaan adeecno Madaxdeena haba na dulmiyeene.

Culimada waxay ku fasireen: Oo haddii lagu kaco oo laga tago in la adeeco Madaxdeena, waxaa ka dhalaneysa dhibab ka waaweyn midka ay dadka iyaga ku hayaan, ee waa inaan u dulqaadannaa dulmigooda oo waxay tirtireysaa xumaanta, maxaa yeelay Eebbe naguma salladin waxaan samaynayno oo xun darteed mooyee. Sidaas darteed waa inaan ku dadaalno inaan badino dembidhaaf weydiisashada iyo inaan isku barbaarino Islaamka saxda ah, waxaan samaynaynana waa inaan hagaajino oo Eebbe waa tii uu yiri:

﴿وكذلك نولي بعض الظالمين بعضا بما كانوا يكسبون﴾

Sidaas oo kale ayaannu madax uga dhignaa qaar ka mid ah Dulmi-wadayaasha qaarka kale wixii ay samayn jireen darteed.

Sidaas darteed haddii ay doonayaan muwaadiniinta inay ka badbaadaan dulmiga xaakimka daalimka ah, ha iska daayaan dulmiga ay samaynayaan nafsaddooda.

Al-callaama Sheekh Albaani isagoo ka faalloonayana arinkan waxa uu yiri: Waxaa halkaas nooga caddaatay qaabka aan uga badbaadi karno dulmiga Madaxda Muslimiinta kuwaa soo annaga naga midka ah oo ku hadlaya afafkeenna, waana inay Muslimiinta u noqdaan Rabbigooda, oo ay toosiyaan

Caqiidadooda, oo ay ku barbaariyaan nafsaddooda iyo reerahooda Islaamka saxda ah, annaga oo ka dhabaynayno hadalkii Eebbe:

﴿إن الله لا يغير ما بقوم حتى يغيروا ما بأنفسهم﴾ (الرعد:١١).

Eebbe ma beddelo dad ilaa maa ay nafsaddooda isbeddelaan.

Waxaana sidaas tilmaamay mid ka mid ah Ducaadda Mucaasiriinta isagoo leh:

(أقيموا دولة الإسلام في قلوبكم، تقم لكم على أرضكم) Ku dhaqma nafsaddiinna Islaamka, kolkaasay dadkuna ku dhaqmayaan.

Mana aha jidka lagu badbaadayo siday u malaynayaan qaar ka mid ah dadka, oo ah in hub loo qaato madaxda, iyadoo la adeegsanayo afgembiyada xoogga ku dhisan, inkastoo ay ka mid tahay Bidcooyinka waqtigan la joogo, haddana waxay ka hor imaanaysaa sida ku soo aroortay Shareecada Islaamka taas oo waxyaabaha la is faray ay ka mid tahay qofka nafsaddiisa inuu isbeddel la yimaado. Sidoo kale waxaa lagama maarmaan ah inaan ula nimaadno sida saxda ah, oo Eebbe Kor ahaaye waa tii uu yiri:

﴿ و لينصرن الله من ينصره إن الله لقوي عزيز﴾ (الحج: ٤٠)

Eebbana wuxuu u gargaari qofkii isaga u gargaara Diintiisa.

Waxaan qoraalkan ka turjumay kitaabka Caqiida ad-Daxaawiya ee uu qoray al-Callaama ad-Daxaawi oo geeriyooday 321 H.

**Oo uu ka dibna sharxay al-Callaama Ibnu Abii-al-Ciz oo geeriyooday 792 H.**

Waxaana ka faallooday qoraalkan oo tacliiqaat saaray al-Callaama Sheekh Maxamed Naasirud-diin al-Albaani oo geeriyooday 1420 H. Eebbana ha u naxariisto dhammaantood.

Turjume: CabdiRisaaq Maxamed Cilmi "ina Warfaa".

# 5-Mushkiladeennu ma madaxdeennaa?

Al-Callaama Sheekh Maxamed Naasirud-diin al-Albaani –Eebbe ha u naxariistee- wuxuu leeyahay talooyin wanaagsan oo ay tahay in lagu dhaqmo marka la tabar daran yahay dadkuna ay ka fog yihiin Diinta dhabta ah. Waxaana halkan ku soo guurinayaa su'aal la weydiiyay Sheekh Albaani, aniga oo soo koobaya jawaabtiisa.

Qof baa wuxuu waydiiyay isagoo oranaya: Waxaan ognahay – Sheekheenow maalmahan –in in badan oo ku sugan dacallada adduunka ay la dagaallamayaan Islaamka, mana aragno Dowladaha oo far dhaqaajinaya; maxaynu ka samaynaa –annagu- arrinkan? ma ku dembaabaynaa haddaanu iska fadhiisanno annagoo aynan far dhaqaajinayn?!

Wuxuuna ku jawaabay hadalkiisa: Waxaa mahadda iska leh Eebbe, Isaga ayaan ku mahadinaynaa oo kaalmo weydiisanaynaa oo dembidhaaf weydiisanaynaa … intaas ka dib:

Su'aashu sida ka muuqato kalama jeedo - markuu lahaa: waan iska fadhiisanaynaa waxaanu samaynaynana ma laha! ee wuxuu kala jeeday: waxyaabo gaar ah ayaanu samaynaynaa ee ma aha wax walba sideedaba ma samaynayno … -Dhamaantana waxaan ognahay- hadduu Eebbe yiraahdo in hadalka Eebbe Kor ahaaye: (إن تنصروا الله ) Haddaad Eebbe u gargaartaan uu yahay Shardi, jawaabtiisuna tahay: (ينصركم … ) Wuu idiin gargaarayaa. Haddaba waxaa la isweydiinayaa: Muslimiintu shardigaas ma sameeyeen, oo ma sameeyeen ugu horeyn waajibkan kaas oo ah shardiga inuu dhaboobo inuu Eebbe u gargaaro Muslimiinta marka xiga?!

Ku kasta oo idinka mid ah jawaabtiisu waxay tahay: Muslimiinta ma aysan samaynin inay u gargaaraan Eebbe Kor ahaaye oo laga wado inay raacaan

Axkaamta Shareecadiisa… Muslimiinta maanta joogta guud ahaan way ka jeesteen inay bartaan Diintooda, iyo barashada Axkaamtiisa! Intooda badan oo iyaga ka mid ah hadday Islaamka wax ka yaqaanaan: waxay yaqaanaan Islaam aan dhab ahayn, waxay yaqaanaan Islaam ka duwan kii uu haystay Rasuulka Eebbe ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee iyo Asxaabtiisa, sidaas darteed gargaarka Eebbe ee uu u ballanqaaday qofkii u gargaara inuu u gargaarayo wuxuu ku xiran yahay in loo yaqaano Islaamka ugu horreyn garasho sax ah sida ku soo aroortay Qur'aanka iyo Sunnada iyo fahamkii Salafka Umadda, ka dibna lagu dhaqmo marka xiga...

Waxaan doonayaa inaan xasuusiyo dadka sidaan mar dhow iri waxay caadaysteen Muslimiinta maanta badankooda... wixii eed oo dhan inay u tiiriyaan Madaxda... Dhab ahaantiina eeddan waxaa loo tiirinayaa Ummadda oo dhan hadday ahaan lahaayeen madax iyo shacabba oo ma aha kan oo kaliya ee waxaa jira koox ka mid ah kuwaas eedeynaya madaxda Muslimiinta... waxay khilaafeen Axkaamta Islaamka markay u mareen waddadii lagu beddeli lahaa xaaladdan jid ka duwan jidkii Rasuulka ammaan iyo nabadgelyada Eebbe korkiisa ha ahaatee iyagoo gaalaysiinaya madaxda Muslimiinta, marka koowaad, ka dibna oranaya waa waajib in lagu baxaa marka labaad... dabadeedna mushkiladda intaas kuma ekaatee, ee arrinku intaasi waa uu ka sii daraa ilaa ay iskhilaafaan Muslimiintaas nafsaddooda, oo ay dhacdo in khilaafkaas madaxda bannaanka ka noqdaan...

Waxaan shaki ku jirin inuu yahay mowqifka cadowga Islaamka asal ahaan Yuhuudda iyo Nasaarada iyo Gaalada kaleba ee ku sugan dhulalka Gaalada ayaa ka dhib badan shaki la'aan qaar ka mid ah madaxdaasi aanan dheg jalaq u siinayn rabitaanka Muslimiinta inay isku dhaqaan dhexdooda wuxuu Eebbe soo dejiyay... Inkastoo ay u arkaan xal inay la dagaallamaan madaxda Muslimiinta lagama goosanayo mirihii la rabay in la helo, maxaa yeelay sidaan mar dhow soo sheegay dhibka kama taagno madaxda oo kaliya ee sidoo kale waxaa la qaba shacabka... Ee halkee wax ka billownaa? Ma waxaa

laga billaabayaa in lala dagaallamo madaxda kuwaas oo ku dhaqaya Muslimiinta ( بغير ما انزل الله) Waxaan Eebbe soo dejin? Mise billowga wuxuu noqonayaa in lala dagaallamo gaalada dhammaantood waddankii ay joogaanba? Mise waxaa laga billaabayaa in lala dagaalo nafta dadka farta xumaanta? Jawaabta: waxay tahay in lala dagaalo nafta, halkan ayay tahay in laga bilaabo, maxaa yeelay Nebigu ammaan iyo nabadgelyada Eebbe korkiisa ha ahaatee wuxuu ka billaabay hagaajinta nafta qaar ka mid ah Muslimiinta ee uu ugu yeeray markii ugu horreysay Dacwada Islaamka... Maxaa yeelay Madaxdaas hadday ahaan lahaayeen Gaalo sida Yuhuudda iyo Nasaarada -siday ku andacoodaan Ururrada Muslimiinta- Ma awoodaan Muslimiinta maanta joogta inay la dagaallamaan Yuhuudda iyo Nasaarada?! Jawaabta waxay tahay: Maya... Sidaas darteed arrinku siduu u dhan yahay waa sidii Muslimiintii ugu horreysay ee xilligii Makka... Sabab? Maxaa yeelay waxay ahaayeen kuwo tabar daran, tab iyo awoodna lahayn waxaan ka ahayn Iimaankooda galay qalbiyadooda markii ay raaceen darteed dacwada Nebigooda ammaan iyo nabadgelyada Eebbe korkiisa ha ahaatee raacitaankaas iyo dulqaadashadoodii wixi dhib ah ee la soo gudboonaado waa kii dhaliyay mirihii la rabay in la helo ee aan annagu maanta raadinayno. Jidka lagu gaaraayo mirahaasi waa isla jidkii ay mareen Rasuulka amaan iyo nabadgelyada Eebbe korkiisa ha ahaatee iyo Asxaabtiisii sharafta badnayd. Sidaas darteed maanta Muslimiinta ma awoodaan inay la dagaallamaan Gaalada maxay tahay inay sameeyaan? Waa inay u rumeeyaan Eebbahooda iyo Rasuulkiisa si dhab ah, hase ahaatee Muslimiinta maanta waa sidii uu Barbaariyaha uumanka yiri: ( ولكن أكثر الناس لا يعلمون) Hase ahaatee dadka badankooda wax ma garanayaan. Muslimiinta maanta waxay muslimiin ka yihiin magaca, ma aha Muslimiin dhab ah... Hase ahaatee waxaan xasuusinayaa hadalkii Alle Kor ahaaye ee billowga suuradda Almu'minuun(luguna macnayn karo afsoomaali ahaan sidan: Waxaa dhab ahaan u liibaanay mu'miniinta.ee ah kuwa salaaddooda ku dhex khushuuca.

Ee ah kuwa  ka jeesta: shirkiga, danbiyada, iyo hadalka aan xaqa ahayn. Ee ah kuwa guta zakada ku waajibtay. Xubintooda tarankana ka dhowra xaaraanta. Waxaanayse raggu ka dhowreyn haweenka ay qabaan, iyo haweenka ay gacantoodu hanatay, ee lugu soo qabto jihaadka gaalada lala dagaallamayo.oo taas luguma eedeeyo haddii ay u isticmaalaan si xaqa waafaqsan. Kuwiise wax intaa ka baxsan raadiya, kuwaasi waa kuwo xadgudbay oo dulmilowyaal ah).

Yay ka muuqdaan astaamahaasi lagu sheegay Aayadaha kore?.

Waxaa kaloo jira Aayaad kale... : (أولئك هم المؤمنون حقا) Kuwaas ayaa Mu'miniinta dhabta ah. Annagase Mu'miniin dhab ah ma nahay?!

Jawaabta waa: Maya; Sidaas darteed Muslimiinta maanta ma aha Mu'miniin dhab ah; maxaa yeelay Iimaanka dhabta ah wuxuu u baahan yahay dhaqangelin dhab ah.

Sida Aayadda aan kor ku soo marnay:

Annaga ma u tukannaa salaaddeena annagoo khushuucsan? Jawaabta waa: maya, Haddii laga eego koox ahaan iyo haddii laga eego Ummad ahaan. waxaa loo baahan yahay in lala yimaado sababihi sharciga ahaa, marki la helo kuwi adduunyada ku saabsanaa, si Rabbigeennu dhibka nooga kor qaado, dhibkaas oo dhammaantannada na wada haysto... Waxaa ka mid ah Axaadiista Nebiga ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee: (إذا تبايعتم بالعينة ...)

Haddaad wax ku kala gadataan Ribada ”Dulsaarka”. Ma jiraa qof idinka mid ah oon la socon inay Muslimiinta isticmaalaan Ribada...?

Waxaan leeyahay mar kale: Ribadaasi ma isticmaalaan qaar ka mid ah madaxda oo kaliya hase ahaatee waxaa kaloo isticmaala qaar ka mid ah shacabka; Maxaa yeelay kuwaasi shacabka ah waa kuwa la shaqaysta

Bangiyada Ribada isticmaala waa kuwa marka lagala doodo oo lagu yiraahdo: Ribada lama oggola waana siduu Nebigu ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee yiri:

"درهم ربا يأكله الرجل وهو يعلم أشد عند الله من ستة وثلاثين زنية".

Dirham Riba ah qofkii cuna isaga oo og wuxuu Eebbe agtiisa ka daran yahay soddon iyo lix jeer oo la sinaysto: (Mana aqbalaayaan)

(Haddii la weydiiyo mid iyaga ka mid ah): Maxaad u isticmaalaysaa Ribada? Wuxuu ku oranayaa? maxay tahay inaan sameeyo? waxaan doonayaa inaan noolaado! Sidaas darteed; arrinku shaqo kuma laha madaxda oo (kaliya) ee dhibka wuxuu ka socdaa shacabka intaan la gaarin madaxda. Run ahaantii fasaadka shacabka wuxuu la mid yahay midka madaxdaasi... Madaxdaasi noogama soo degin xiddigga Marriikh ama Maaris?! ee annagay naga mid yihiin naguna dhex jiraan, ee haddii aynu doonayno inaan hagaajinno xaaladdeenna: Ma aha inaan la dagaallanno madaxdeenna oo aan hilmaanno nafsaddeenna...

Dhibaatooyinka maanta jira oo dhan oo ay la laablakacsan yihiin qaar ka mid ah dhalinyarada, oo ay leeyihiin maxaa la sameeyaa? Ma lagu xallin karo laablakac, ee waa in lagu xalliyaa aqoon iyo waxqabad:

( وقل اعملوا فسيرى الله عملكم ) Waxaa tiraahdaa ku dhaqma (wax Alle raalli ka yahay) Eebbana wuxuu arki doonaa dhaqammadiinna.

Qaar ka mid ah iyaga waxay u arkaan inuu yahay dhibka Yahuudda qabsashadeeda Falastiin, dhibkana waa kii aan mar dhow ka soo hadalnay: Annagana waxaan leennahay: Dhibka ugu wayn ee maanta jiraa waa kala qaybsanaanta Muslimiinta ay ku kala qaybsan yihiin ... kooxo iyo ururo...

Waqtigan xaadirka ah kooxooyinka Muslimiinta ee hadda jira waxay isku khilaafsan yihiin jidkii lagu xallin lahaa dhibka jira.

Waxaa jira waddooyin:

Waddada koowaad ee aan lahayn mid labaad waa in loo fahmaa Islaamka faham sax ah lana dhaqan geliyaa, laguna barbaariyo Muslimiinta Islaamkan sifaysan, sidan ayayna ahayd Sunnada Rasuulka ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee sidaan soo sheegnay mar walbana waan sheegaynaa: Markuu Rasuulka Eebbe uu bilaabay Dacwada inuu gaarsiiyo Asxaabta wuxuu ugu yeeray inay rumeeyaan Eebbe iyo Rasuulkiisa ka dibna wuxuu baray Axkaamta Islaamka wuxuuna faray inay ku dhaqmaan markii ay ka cabanayeen wixii ka soo gaaray Gaalada ee xadgudub ahaa iyo sida xun ee Gaalada ula dhaqmi jirtay wuxuu fari jiray inay dulqaataan.

Waxaa jira dhaqdhaqaaqyo ama xarakooyin, iyo dacwadooyin kale oo dhammaantood ka hor imaanaya waddadii aan soo sheegnay oo aan lahayn mid labaad; Waxay leeyihiin: Islaamka barashadiisa dhinac iska dhiga, halkii laga baran lahaa ama lagu dhaqmi lahaa, hadda arrinka ugu muhiimsan waa inaan u midownaa la dagaallanka Gaalada Eebaha Hufnaayow sidee loola dagaallami karaa hub la’aan?. ... Jawaabta aan la isku khilaafsanayn waxay tahay: Is hubeey dabadeed dagaallan, waa marka laga hadlayo dhinaca maaddiga. Ma haddaan ka hadlayno dhinaca Diinta: ...

Haddii aan doonayno inaan la dagaallanno Gaalada Islaamka dhinac iskama dhigi karno; Maxaa yeelay Eebbe sidaas nama farin...

Annaga ma awoodno maanta oo ma haysanno wax hub maaddi ah oo lagu dagaalgali karo...

Waxaan leennahay ma doonaynaa inaan ku dagaal galno hubka maaddiga ah; Kaasi nooma suurtoobayso. Hase yeeshee waxaa gacmaha noogu jiro hubka Diinteenna ah:

(فاعلم أنه لا إله إلا هو واستغفر لذنبك)

Waxaad ogaataa inuusan jirin ku xaq lugu caabudo oo Eebbe aan ka ahayn, Eebbahaa waydiiso inuu kuu dembi dhaafo. Aqoon u yeelo Diintaada ka dibna ku dhaqan – intaan awoodno – Markaan Diinteenna baranno kuna dhaqanno ka dib ayaa na looga baahan yahay inaan u diyaarsanno hubka maaddiga ah sida uu Eebbe Kor ahaaye na leeyahay:

(وأعدوا لهم ما استطعتم من قوة ومن رباط الخيل ترهبون به عدو الله وعدوكم)

U diyaarsada intii aad kartaan oo awood iyo fardo xirasho ah oo aad ku cabsiinaysaan cadowga Eebbe iyo cadowgiina.

Maxaan ka billownaa?! waxaan ka billaabaynaa ugu horreyn siday u kala muhiimsan yihiin; gaar ahaan hadduu fudud yahay kan ugu muhiimsan waana hubka Diinta: oo ah in Islaamka loo fahmo faham sax ah, loona dhaqangeliyo dhaqangelin sax ah ka dibna hubka maaddiga ah hadduu fudud yahay.

Maantase nasiib xumo wixii ka dhacay Afganistaan hubkii maaddiga ahaa ee ay Muslimiinta kula dagaallameen shuuciyadda ma wuxuu ahaa hub Islaami ah.

Jawaabtu waa: Maya, wuxuu ahaa hub reer Galbeed leeyahay, sidaas darteed annaga maanta dhinaca hubka maaddiga waxaan kala joognaa kaaf iyo kala dheeri haddaannu maanta dooni lahayn inaan dagaallanno oo aan ku fiicannahay dhinaca awoodda Diinta.

Haddaanu dooni lahayn inaan ku dagaal galno hubka maaddiga ah waa inaan hubkaas dibadda ka keensannaa annaga oo soo gadanayno ama nala siinayo, ama aan ku dhaafsiisanayno wax kale, oo aad ka tanaazulayso wax islaamkii ka mid si hubkii luguu siiyo, iyadoo ay kuula sii jirto in aad lacagtiisiina dhiibtay ...

Sidaas darteed walaalaheenow ma aha sidaan u malaynayno xalku: Laablakac iyo fudayd dhalinyaronnimo iyo kacaannimo ka dibna aan lahayn wax muuqda oo natiijo ah...

Raacitaan la'aanta jidka Mu'miniinta ayaa keentay musiibooyinka tii u waynayd oo ah inay Yuhuuddu qabsato Falastiin.

Musiibada dadka Muslimiinta maanta haysatana waa inay ka baadiyoobeen jidkii toosnaa...

Haddii ay Muslimiinta – waqtiyada qaarkood – ahaayeen kuwo tabardaran oo ay Gaaladu dhibto oo la laayo ka dibna ay dhintaan waxaan shaki ku jirin inay dhinteen iyagoo kuwo kheyr qaba ah, haba ku ahaadaane Adduunka kuwa tabar daran. Kiise iyaga ka mid ah oo Adduunka ugu noolaado isagoo ka fog fahamka Islaamka siduu Eebbe Kor ahaaye iyo Rasuulkiisa doonayay kaasina wuxuu dhimanayaa isagoo sharqabe ah; Haba la moodee inuu haysto nolol raaxo leh.

sidaas darteed- Eebbe ha idin barakeeyee- Xalku wuxuu ku jiraa:(ففروا إلي الله)

U carara Eebbe xaggiisa. Fahma wuxuu Eebbe yiri iyo Rasuulkiisa, iyo waxay yiraahdeen Saxaabada, kuna dhaqma wuxuu Eebbe yiri iyo wuxuu Rasuulkiisa ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee yiri iyo waxay ku dhaqmeen Saxaabada...

Intaas ayaan ku soo gabagabaynayaa jawaabta su’aashaas.Waxaana laga soo guuriyay wargeyska la yiraahdo ” المجلة السلفية al-Majala as-Salafiya tirsiga 9aad, 1425 H”. Waxaana maqaalkan laga soo qaatay kitaabka uu qoray Dr Cusmaan Macalin Maxamuud ee la yiraahdo "xaqiiqatul muwaalaatil mukaffira".Waxaana turjumay CabdiRisaaq Maxamed Cilmi ”ina Warfaa” iyo walaal Naasir oo ka mid ah walaalaha shabakadda Maktabada.com” oo hawsha diyaarinta maqaalkan igala qayb qaatay.

## 6- Xalku ma xabbad baa mise waa xaalid

**Mashaayikhda salafiyiinta soomaaliyeed**

Allaah waxa uu culimada ballan kaga qaaday in ay dadka u caddeeyaan waxa uu ilaahay soo dajiyay, hadaba ma qarsoona maanta dhibaatooyinka ka jira guud ahaan caalamka islaamka gaar ahaanna soomaaliya: dhiig la daadiyo, kala tagsanaan iyo is-dhacba, taas oo badankeedana ay sababeen dad aynu wadaagno islaamnimo iyo soomaalinimoba ha ahaadeen kuwo halku dheg ka dhiganaya soo celinta kala danbaynta iyo dawladnimada amma ha ahaadeen kuwo jihaad sheeganayee.

Arrimahaas oo dhani waxay nagu keensanayaan haddaannu nahay mashaayikhda dacwadda salafiyada (*ahlus-sunnah wal-jamaa$^{c}$ah*) in aan caddayno mawqifkayaga ku wajahan dagaallada dalka ka soconaaya muddada 20ka sanno iyo siyaadada ah, sidoo kale caddaynno farqiga u dhaxeeya jihaadka sharciga ah iyo dagaalka fitnada ah, annaga oo ku salaynayna adillada sharciga ah iyo jawaabaha ahlu cilmiga.

**Ugu horrayntii**

Erayga fitna afcarabiga waxaa loo isticmaalaa macneyaal dhawr ah sida: imtixaanka-waxa imtixaanka ka dhasha lana necebyahay-waxkastoo la neceb yahay-dilka iwm.

Fitnada caamka ahna waxaan ku qeexi karnaa: waa wax kasta oo sharciga khilaafsan qawl iyo ficil ba keensadana ammaan darro iyo tafaraaruq.

Ahlus-sunnah waljamaacana waxaa aasaasiyaaatka caqiiqadooda ka mid ah in ay xaaraan tahay in laga qayb galo dagaallada fitnada sida uu caddeeyay shaykhul islaam ibnu taymiyah iyo qayrkiiba .

Rasuulkeennuna (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) waxa uu yiri wakhtiga fitnada: (**leebabkiinna iyo qaansooyinkiinna jajabiya, guryihiinnana jooga, kii geel lehaw geelaaga raac, kii ari lehaw arigaaga raac, kii beer lehow beertaada falo**), talooyinka nuucaas ah ayuu

rasuulkeennu (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) ku taliyay waana sharcigiisii haddaan nahay dad muslimiin ah oo rasuulka raacsan.

Dhiigga muslimkana rasuulku aad ayuu u adkeeyay, qofkii qof ashahaadanaya dilow maxaad (*laa ilaaha illallaah*) ka yeelaysaa maalinta qiyaamaha sidii uu Rasuulku (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) ku yiri usaame ee waliba uu ku celceliyay mar uu dagaal gaalo lagula jiray nin dilay ka dib markuu ashahaatay.

Waxa uu yiri rasuulku (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye): "**Qofka muslinkii wuxuu dhabar fudud yahay oo khayrka u degdegi ogyahay intaanu daadin dhiig xaaraan ah**", waxa kale oo uu yiri: "**in adduunyada dhammaanteed ay baaba'do ayaa ilaahay kala fudud dilka qofka muslimka ah**" iyo axaadiis kale oo badan.

Sidaas awgeed mashaayikhda salafiyiinta ahi waxa ay ku baaqayaan sida caqiidada salafkeenna suubban ay tahay in aan laga qayb galin dagaalladaas, waxaanay caddaynayaan in dagaallada soomaalida u dhaxeeyay ay yihiin xaaraan iyo fitno horrayso iyo danbaysaba, waxa hadda waddanka ka jiraana waa fitno.

Iyagoo taa ku daraya in ay waajib tahay in cadawga gaal ka ah dalka laga difaaco haddii la helo shardiga ah in awood loo leeyahay sida rabbigeen ku yiri aayaadda fasiraaddeedu tahay: "***ilaahay nafna kuma kallifo wax ay awooddo mooyaane wax kale***".

Awoodda sharciga ahina ma aha kaliya in ficilka la samayn karo eh waa in la samayn karaa ficilkii iyada oo aanu dhibkii hore mid ka wayni ka imanaynin sida ay adillada sharcigu keensanayso, caddeeyeenna culimada islaamku sida shaykhul islaam ibn taymiyyah .

shaykh Cabdil-muxsin al-cabbaad oo bishii sidataal dhammaadkeedii la waydiiyay dagaalka soomaaliya ka socda iyo dadka rayidka ah dhexdooda in

hub lagaga tuuro itoobiyaanka ka dibna ay ummada gummaadaan ayaa ku jawaabay: "wax faa'iido ahi kuma jirto in qof cadawga laga dilo kadibna ay toban dilaan ama boqol iyagoo aan dhulkiina kaga baxayn qofkaa laga dilay…waa in labada dhib ka sahlan lagu adkaysto si looga cararo ka wayn, qofka hal cadaw ah dilay ka dibna boqol loogu aaray naftiisii iyo dadkii kaleba dhib ayuu usoo jiiday".

Haddii la dagaallankii cadawga uu dhibkii hore mid ka wayni ka imanayo oo aanay ujeeddadii dagaalka laga lahaa ku imanayn oo ahayd in cadawga la saaro xaaladdaas jihaadku sharci ahaan mid sax ah ma ahan.

Waxaana lagu dhaqmayaa adillada sheegaysa in la iska sabro.

Dhibka iyo fitnadana waxaa looga bixi karaa:

1. in la toobad keeno oo si dhab ah diinta loogu noqdo barasho iyo ku dhaqanba.
2. In la sabro.
3. In la midoobo oo la is urursado, lana iska jiro in lala keli noqdo arrimaha ummadda u dhexeeya sida dadka ay talada u dhiibanayaan oo kale.
4. Arrinka ummadda in loo celiyo cidda taladu ka go'do culimada iyo dadka loo soo joogsado.

Dadka xukunka ku loollamaya koodii soo baxana waxaan ku leennahay hadalkan uu yiri shaykhul islaam ibn taymiyyah :

"Xaakimku haddii uu qasadkiisu yahay dadka hagaajintooda iyo xumaan reebidda si uu wixii dheef ah ugu soo jiido wixii dhib ahna uga kor qaado isaga oo ilaahay wajigiisa ku doonaya ilaahay quluubta dadka ayuu u jilciyaa, khayrkana waa u fududeeyaa, dhibka dadkana waa kaga fillaadaa, haddii qasadkiisu yahay sarrayn,madaxtinnimo, iyo in la wayneeyo oo la siiyo wuxuu doono oo xoolo ah, ilaahay ujeeddadiisa wuu ku daba gaddiyaa".

Dadka qaarkood oo mooday in dagaalka fitnada ah la galaayo haddii cidda dulman loo gargaarayo amma xumaan la baabi'inayo waxaannu ku leenahay:

Ma aha sidaad mooddeen, sharkuna inuu dagaalkaa ku sii bato dhiig badanna lagu daadiyo mooyaane kuma yaraanayo, sidaa awgeed ayaanu rasuulku (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) ku talinnin xilligan oo kale in hub la qaato kuna taliyay in hubka la jajabiyo, adilladaas khaaska ku ah waqtiga fitnada ayaana laga hor marinayaa adillada caamka ah ee tilmaamaysa suulinta munkarka iyo u gargaarka cidda dulman iyo waxa la midka ah ee gacan in wax lagaga qabto u baahan. Culimada usuululfiqhigu waxay caddeeyeen in naska gaarka ah laga hormarinayo kan caamka ah haddii loo maleeyo in ay iska hor imanayaan.

Ummad meel ay u gurya noqoto leh oo ku hoos jirta maamul midaysan oo wax laga maqlayo ayaa jihaadda, iimaan iyo camal suubbanna leh, haysatana awood ay wax iskaga dhicin karto iyo adduun, jihaadku ma aha wax la iska xiiso ka dibna la iskaga dhaqaaqo, dagaallada looga jeedo in cadawga lagu wiiqana waxa ku kici kara ummad raasa maalkeedu u bad qabo meelna ku hubsatay, laakiin qof raasamaalkiisii dayacan yahay macaash siduu u damci, rasuulku (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) waxa uu yidhi: "uma habboona qofka muslimka ah in uu naftiisa dulleeyo", siduu u dullaynayaa ayaa la su'aalay wuxuu yiri: "wuxuu u ban baxayaa dhib aanu qaadi karin". Wuxuu dhahay shaykh mash-huur aal salmaan: "jihaadku waqtiyada adag iyo xaaladaha aan caadiga ahayn wuxuu u baahan yahay in duruuftiisa la dhawro iyo waxa ku xeeran, mana aha jihaadku sida salaadda mid ay lagama maarmaan tahay in lala yimaad xaaladdu si kastaba ha ahaatee".

Jihaadku waa aalad wax lagu gaaro eh yool maaha haddii aan yoolkii lagu gaarayn ee uu duminayo jihaad ma noqonayo.

axkaamta jihaadka ee qotada dheerna kaliya waxaa ka hadli kara culimada kuwooda sida gaarka ah cilmiga ugu xeel dheeraaday, sida ibnutaymiya uu yiri.

Camalka hadda loo baahan yahayna kuma koobna jihaad kali ah, waxyaabo badan ayaa ummaddeennu idiinka baahan tahay ilaahayna idiin sharciyeeyay idinna aad karaysaan, haddaba taas ku mashquula oo waqtigiinna ku bixiya, naftininana noo ilaaliya dadku way idiin baahan yihiine, idinma lihin meel iska fadhiista eh waxaan leennahay diintiinna barta naftiinna iyo dadkiinnana ku anfaca.

Dadkuna waa muslim iyo gaal iyo munaafaq, munaafaquna waa qofka islaamnimo sheeganya gaalnimona qarsanaya, waxaana lagula dhaqmayaa axkaamta qofka muslimka ah, dhiiggiisa iyo maalkiisuba waa ay dhawrsoon yihiin inta adduunyada la joogo aakhirana naarta halka ugu hoosaysa ayuu galayaa.

Muslimkuna wuxuu noqon karaa faasiq isagoo asal ahaan muslim ah kagana bixi maayo islaamka in uu muslimiin la dagaallamo amma uu gaalo xiriiriyo oo sokeeye la jecel yahay ka dhigto, ama uu u soo kaalmeysto dagaal uu koox kale oo muslin ah kula jiro, ilaa la ogaado in ay ka tahay islaamnimo nacayb ama gaalnimo jacayl markaas ayuu islaamka ka baxayaa, haddii kalase waa faasiq danbi weyn ku jira. Imaamu shaafici allaah ha u naxariistee waxa uu yiri isaga oo soo xiganaya qissadii saxaabigii xaadib ibn abii baltacah :in gaalo lagu taageero in ay muslinka dhib gaarsiiyaan gaalnimo cad ma ahan eh waxaa la eegayaa waxa qofka ku xanbaaray sidii rasuulkuba ka yeelay xaadib.

Adillada tilmaamaysa qof danbi macsi ah sameeyay in iimaanka laga anfiyona laga fahmi mayo in qofkaas uu gaal yahay, iimaanka waa la anfiyi karaa iyadoo loo jeedo ma dhammays tirna.

Ummadda soomaaliyeed waa dad muslim ah ilaahay fadligii, islaamnimadooduna waa yaqiin markaa loogama bixin karo islaamka iyadoo aan yaqiin la mid ah taas loo hayn.

Waadna la socotaan axaadiithta ka digaysa gaalaysiinta dadka muslimka ah, Waxaana ka mid ah: "**Haddii nin uu walaalkii ku yiraahdo gaal yahow labadooda mid uun bay ku dhacaysaa, haddii qofku sidaa lugu sheegay yahay waa meesheeda, haddii kalase qofkii wax gaaleysiiyay bay ku soo noqonaysaa**", xadiithkaa bukhaari iyo muslim baa weriyay.

Waxaa kaloo ku sugan xadiith bukhaari iyo muslin weriyeen, erayadana bukhaari leeyahay: "**Qofkii naftiisa aalad ku dila aakhira ayaa isla aaladdii lugu cadaabaa, qofkii mu'min lacnadana wuxuu la mid yahay isagoo dilay, qofkii gaalnima ku ganana wuxuu la mid yahay isagoo dilay**".

Dad aan aqoon diinta u lahayn oo la iska taqliidsado aakhiro lugu badbaadi mayo, oo qofki aad disho aakhiro gacanta ayuu ku soo qabanayaa markaasuu leeyahay "**Rabbiyow weydii ninkan waxa uu ii dilay, haddii jawaabtu noqoto in hebel meel gaaro, waxaa Alle kuugu jawaabayaa hebel sharafta ma leh, markaas baad danbigii weynaa dhabarka u dhigataa**" sida uu Nasaa'i weriyay, sheikh albaanina xukumay inuu sax yahay.

Sida oo kale mashaayikhdu waxa ay aad u ceebaynayaan kana soo horjeedaan qaraxyada loo geysanayo dad aan sharcigu bannayn dhiiggooda sida kuwii laga geystay Hargaysa iyo Boosaaso waxaanay caddaynayaan in arrintaasi khilaafsan tahay shareecada islaamka waana xaaraan sababahan awgood.

1. waxaa lagu dilaa dad dhiiggoodu dhawrsoon yahay oo muslimiin ah dhiigga muslimkuna xurmada uu leeyahay axaadiithtii kor ku xusnayd ayaa innoogu filan.

2. qaraxyadan qaarkood waxaa dhacda in qofkii gaystay uu naftiisa ku dilo taasina waa xaaraan ilaahay waxuu yiri :"**nafihiina ha dilina ilaahay waa idiin naxariis badan yahay eh**".

   Rasuulkuna (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) waxa uu yiri : "**qofka buur iska soo tuura oo sidaa naftiisa ku dilaa naarta jahannama ayuu ku hoobanayaa isagoo sidaa ku waaraya, qofka sun**

**kabbada oo sidaa naftiisa ku dilaana gacanta ayuu suntii ku haysanayaa naarta jahannama dhexdeeda waanu ku waarayaa, qofka bir isku dilaana birtii ayuu gacanta ku haysanayaa oo uu isku wareemayaa naarta jahannama dhexdeeda, waanu ku waarayaa**" iyo axaadiith kale oo badan.

3. waxa lagu baabi'iyaa hanti dhawrsoon oo lugu tirtiraa, iyadoo dad nabad ahaana lagu argagax galiyo waxaanay dhalinaysaa kala danbayn la,aan taasna ma aha wax uu u qasdo qof Allaah iyo qiyaamaha rumaysan.
4. haddiiba xataa laga soo qaado in gaalo la beegsanayo iyagana lama oggola in la laayo hadday yihiin wafdi ama dad ergo ah, rasuulkeennuna (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) waxa uu sheegay in aan ergada la dilin, sidoo kale haddii uu qof muslim ahi nabad galyo u fidiyay in lagu ballan buriyaa ma bannaana walaw gabar muslimad ahba ha ahaato cidda nabad galyada u fidinaysaaye sidii uu rasuulkuba (ammaan iyo nabad gelyo korkiisa ahaataye) u tix galiyay nabad galyada ninkii ay ummu haani' nabad galisay.

Haddaba ilaahay ha laga cabsado oo sabab ha u noqonnina in gaaladu ay dhulka muslimiinta qabsadaan idinkoon wax tamar ah u hayn oo aad kaga dhicisaan, hana falina wax ay faaiidadiisu tahay kaliya in dacwadii ciriiri la galiyo oo dib u dhac ku yimaaddo.

Marka waxaan ku talinaynaa in dhinaca nabadgelyada la xigsado, lagana fiirsado tallaabooyinka lugu dhaqaaqayo.

Wanaagga Allaha nugu duwo, islaamka iyo sunnadana Allaha nugu dilo, waddankeennana Allaha noo hagaajiyo.

Ilaahay waxaan waydiisanaynaa danbi dhaaf iyo naxariis iyo ciddii dhunsan in uu hanuuniyo.

# Su'aalo ku saabsan waaqica maanta jira.

*Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud*

**a- Maxay tahay daacadda ay ku leeyihiin dadka madaxweynayaasha ah ama waddamada xukuma, ahlu sunnuhu maxay ka aamminsan yihiin mas'alada ah in la adeeco ninka madaxweynaha ama amiirka ah, waa maxay manhajka ahlu sunnuhu?**

بسم الله

Sheekhu waxa uu ku jawaabay furfurashadii khubada xaajada ka dib:

sunnada Rasuulku ﷺ mowqif cad yay ka taagan tahay mas'aladaas ah qofkii xaakim ah oo muslim ah in la adeeco oo aan lagu khuruujin. Oo nusuusta Rasuulka ﷺ ka sugnaatay way ku tawaaturtay; waxay ka mid tahay nusuusta mutawaatirka ah oo shaki yar aanu ku jirin oo ahlu-cilmigu isku waafaqsan yihiin.

Haddaba, waxaa ka mid ah axaadiithta rasuulka ﷺ oo dadka madaxda u ah muslimiinta in la adeeco faraysay, xadiithkii Cibaadatu ibnu saamit ee ahaa:

**((دعانا النبي ﷺ فبايعْناه فكان فيما أخذ علينا أن بايَعَنا على السمع والطاعة في منشطنا ومكرهنا، وعسرنا ويسرنا، وأثرة علينا، وأن لا ننازع الأمر أهله– قال:– إلا أن تروا كفرا بواحا عندكم من الله فيه برهان))**[1].

Rasuulkaa noo yeeray markaasbaan la mubaayacoonnay, waxyaabihii uu nagula sharad-tamay waxaa ka mid ahaa in uu nagula mubaayacooday

**(على السمع والطاعة في منشطنا ومكرهنا وعسرنا ويسرنا وأثرة علينا)** in aan maqalno oo adeecno ninkii madaxda ahaa, ama markaa aan nashaad lahaanno oon firfircoonaanno oo mas'aladaas si fiican ugu soo jeedno ama aan dhibsanna ee; wixii na cusleynaaya iyo wixii noo fududba iyo haddii wax nagala keli noqdo; oo madaxtinnimadii qaar naloo diido; ama xoolihii muslinka ka dhexeeyay lala keli noqdo oo naloo diido in aan iska sabarno; oo daacadii aannaan ka bixin haddii xitaa saas ay nagu dhacdo.

1- **(وأن لا ننازع الأمر أهله)** iyo in aannan kula murmin oo aannnaan ku qabsan madaxtinnimadii iyo xukunkii ninkii madaxda ahaa oo muslimka ahaa.

2- **(إلا أن تروا كفرا بواحا عندكم من الله فيه برهان)** in aad aragtaan moogiye gaalnimo cad – mid uu qarsanaayo ma ahan – **(بواحا)** sida uu Khaddaabi ku fasiraayo; waa wax aan la qarinaynin.

(١)– صحيح البخاري برقمي ٧٠٥٥ و ٧٠٥٦، وصحيح مسلم برقم (١٧٠٩) واللفظ لمسلم.

Marka kufriga bawaaxa ah oo iska cad aad aragtaan uun baad kula doodi kartaan, kuna qabsan kartaan madaxtinimadii. Oo iyadu ahlu-cilmigu shardi kale u sheegaan; oo ah, in awood loo leeyahay in ninkii meesha laga qaado iyadoo aanay ka dhalanaynin dhibaato ka wayn wixii la doonayay in la suuliyo; oo ummaddii xaggii diinkeeda iyo duunyadeedaba ah.

Waxaa marka xadiithkaas laga fahmaayaa in la adeecayo ninka madaxda ah, aanay ku xirnayn in aan xaqii annagu aan ku laheyn ka helno oo aduunyo ku saabsanaa. Ama ha noqoto xoolihii aan xaqqa ku lahayn ama maamulka iyo wixii ku saabsan. Oo haddii uu noo diido xaqqii aan lahayn in aan adeecno ayaa nalaga rabaa. Riwaayad uu Imaamu Axmad leeyahay waxay siyaadisay: (وإن رأيت أنَّ لك) aadba aragtid ood ictiqaadisid in aad xaq ku leedahay arrinka, ama ka mudan tahay kan haysta.

Haddaba, malaha noocaas oo kale ah haka hor marin bay ku fasireen xadiithka; ee ninka adeec ilaa arrinku ku soo gaaro adiga oon daacadii ka bixin. Haddii madaxtinnimadii laguu dhiibo qabo oo markaa xaqeeda sii.
Lakiin in aad tiraahdid ma ahan: maxuu iigu dhiibi waayay oo aad kula dagaallanto; oo aad tiraahdid: waan baddalaynaa.
Riwaayad kale waxaa ku jirtay, (وإن أكلوا مالك وضربوا ظهرك) nimankaas madaxda ahi xoolahaaga ha cunaan, dhabarkaagana ha garaacaan e.

**عن عبادة بن الصامت عن النبي ﷺ قال: اسمع وأطع في عسرك ويسرك ومنشطك ومكرهك وأثره عليك وإن أكلوا مالك وضربوا ظهرك.**[1]

Waxaa muslim ku wariyay xadiithkii Ummusalama in rasuulku yiri ﷺ:

**« سَتَكُونُ أُمَرَاءُ فَتَعْرِفُونَ وَتُنْكِرُونَ فَمَنْ عَرَفَ بَرِئَ وَمَنْ أَنْكَرَ سَلِمَ وَلَكِنْ مَنْ رَضِىَ وَتَابَعَ ». قَالُوا: أَفَلاَ نُقَاتِلُهُمْ قَالَ: « لاَ مَا صَلَّوْا »**[2].

(**سَتَكُونُ أُمَرَاءُ فَتَعْرِفُونَ وَتُنْكِرُونَ**) ragga madaxda ah oo iman doona waxna waad ka garan doontaan oo waxaad arkaysaan iyagoo sharciga wax waafaqsan ku dhaqmaya, waxna waad ku inkireysaanoo iyagoo sharciga dhinac maraya ayaad arkaysaan. (**فَمَنْ عَرَفَ بَرِئَ**) (**وَمَنْ أَنْكَرَ سَلِمَ وَلَكِنْ مَنْ رَضِىَ وَتَابَعَ**) haddaba qofkii arrinkaas ogaada baribuu ka noqdaa oo qalbigiisana ka inkira, kan inkirana waa badbaadaa, laakin waxaa dhib haystaa oo dambaaba qofkii xumaanta ku raaca, markaas bay waxay yiraahdeen (**أَفَلاَ نُقَاتِلُهُمْ**) miyaannaan la dagaallamaynin maadaama ay khalad ku dhacayaan oo danbiyo waaweyn la imanayaan? Markaas buu wuxuu yiri (**لاَ مَا صَلَّوْا**) hala dagaallamina inta ay ka dukanayaan. Waa shardi labaad haddaba, xadiithkii (**عبادة بن الصامت**) waxaan ku aragnay in aan madaxtinnimada lagu qabsan in gaalnimo cad lagu arko mooyee. Xadiithka (**أُمِّ سَلَمَةَ**) wuxuu sheegayaa – inkastoo xumaan aan ku aragno nimankan madaxda ah – arrintu haddii ay gaalnimo gaarsiisnayn in aanan lala dagaallameynin,

(١)- رواه ابن عاصم في "السنة" (١٠٢٦)، وابن حبان في "صحيحه" ١٠/ ٤٢٥ - ٤٢٦ (٤٥٦٢) وصححه الألباني في ظلال الجنة.
(٢)- صحيح مسلم، باب وجوب الإنكار ٢٣/٦.

laakiinse shardi kale ayaa yimid meeshii "inta ay dukanaayaan" weeye. Oo salaadddii haddii ay ka tagaan iyadana, waa lagu qabsan karaa; laakiin shardigii hore oon sheegeynana meesha waa jiraa oo, waa in uu fasaad ka wayn aanu ka imaanayn meeshii.

**Muslim wuxuu ka wariyay (عَرْفَجَةَ) rasuulka ayaan maqlay oo dhahaya :**

**« إِنَّهُ سَتَكُونُ هَنَاتٌ وَهَنَاتٌ فَمَنْ أَرَادَ أَنْ يُفَرِّقَ أَمْرَ هَذِهِ الأُمَّةِ وَهْىَ جَمِيعٌ فَاضْرِبُوهُ بِالسَّيْفِ كَائِنًا مَنْ كَانَ »[١].**

**waxaa dhici doona waxyaabo aanan fiicnayn (إِنَّهُ سَتَكُونُ هَنَاتٌ وَهَنَاتٌ)**

**qofkii doona in uu kala geeyo ummaddan arinkeeda (فَمَنْ أَرَادَ أَنْ يُفَرِّقَ أَمْرَ هَذِهِ الأُمَّةِ)**

**iyadoo wada jirta. (وَهْىَ جَمِيعٌ)**

**waa nin hoggaamiye ah oo muslim ah rabana in uu kala geeyo ummaddii.**
**seef ku garaaca qofkuu doonaba ha ahaadee. (فَاضْرِبُوهُ بِالسَّيْفِ كَائِنًا مَنْ كَانَ)**

**Sababta oo ah kala geynta ayaa ka dhib badan in ninkaas kaliya la dhowro oo qiimo loo yeelo.**

**Waxaa kaloo rasuulka ka sugnaatay ﷺ in uu yiri :**

**« مَنْ رَأَى مِنْ أَمِيرِهِ شَيْئًا يَكْرَهُهُ فَلْيَصْبِرْ فَإِنَّهُ مَنْ فَارَقَ الْجَمَاعَةَ شِبْرًا فَمَاتَ فَمِيتَةٌ جَاهِلِيَّةٌ »[٢].**

**Qofkii ninkii madaxda u ahaa ka arka wax uu dhibsanaayo ha iska sabro,** maxaa yeelay qof ma jiro jamaacadii faaruqay taakaba Allaha ka dhigee oo khilaafay oo saas ku dhinta; dhimashadiisu waxay noqotaa dhimasho jaahiliya loo aaneeyay.

**عن نافع قال: لما خلع أهل المدينة يزيد بن معاوية جمع ابن عمر حشمه وولده فقال : إني سمعت النبي ﷺ يقول: (ينصب لكل غادر لواء يوم القيامة ) . وإنا قد بايعنا هذا الرجل على بيع الله ورسوله، وإني لا أعلم غدرا أعظم من أن يُبايَع رجل على بيع الله ورسوله ثم ينصب له القتال، وإني لا أعلم أحداً منكم خلعه ولا تابع في هذا الأمر إلا كانت الفيصل بيني وبينه[٣].**

Waagii dagaalka "Xarra" uu ka dhacaayay Madiina, qolooyin baa Yaziid yiri **madax-tinnimadiisa annagu ma-ogolin waan la dagaallamaynaa, Ibnu Cumar ayaana ugu cilmi badnaa meesha, uguna fadhli badnaa, laakiin Ilaahay amarkiis warkiisa lama yeelin, markii warkiisa la yeeli waayayna, oo wixii uu soo daliiliyana la qaadan waayay dhibkii dhacay waa la ogaa oo magaalada Madiina ka dhacay. In dadkiiba la baabi'iyay, oo ciidanki dowladdu saddex maalmood sida ay rabaan ka yeelaayeen magaalada; oo dadkii ay aad u dhibtoodeen.**

**Markii arrinkaas uu arkay in dadkii dad kale la mubaayacoonayaan oo Yaziid na rabaan in ay ka takhallusaan, oo ay go'aansadeen arrinkaas; buu wuxuu u yeeray**

(١)– صحيح مسلم، باب حكم من فرق أمر ... ٢٢/٦.

(٢)– صحيح مسلم، باب الأمر بلزوم الجماعة، ٢١/٦ من حديث ابن عباس.

(٣)– صحيح البخاري، باب إذا قال عند القوم ٢٦٠٣/٦.

**dadkii isaga xigtada u ahaa, iyo Ilmihiisii markaas buu ku yiri: waxaan maqlay rasuulka Ilaahay oo leh:**

( ينصب لكل غادر لواء يوم القيامة ) **Ninkasta oo khiyaanalow ah calan baa loo taagaa qiyaamaha, si ay dadku u arkaan (وإنا قد بايعنا هذا الرجل) ninkaan madaxda ah oo Yaziid la yiraahdo – waxaad ka fahmaysaa in uu leeyahay wax kastaba halaga sheegee – waxaan kula mubaayacoonnay (على بيع الله ورسوله) wuxuu ka wadaa kitaabka Allaah iyo Sunnada Rasuulka ayaan kula mubaayacoonnay ayuu leeyahay. (وإني لا أعلم غدرا) Khiyaamo ma ogi buu leeyahay (أعظم) ka wayn ( من أن يبايع رجل) in qof lala mubaayacoodo (على بيع الله ورسوله) (ثم ينصب له القتال) kadibna dagaal loogu labisto (وإني لا أعلم أحدا منكم خلعه) anigu maanta garan maayo qof idinka mid ah oo ninkaas yiraahda madax iima aha waana la dagaallamayaa, mana la mubaayacoonaayo, (ولا تابع في هذا الأمر) ama dadkan ku kacsan raaca ( إلا كانت الفيصل بيني وبينه) taasi haddii ay dhacdo mas'aladii aannu ku kala go'i lahayn bay noqoneysaa, isma naqaan ayuu leeyahay.**

**Marka nusuus fara badan oo noocaas oo kale ah ayaa jirta, Mad-habka Ahlu Sunnuhu waxa ay qabaan in dadka madaxda ah haddii ay wax dulmiyaan oo ay jowr sameeyaan, aanay daacadii saas ku weynayn; maadaama aanay la imaannin gaalnimo cad oo sida qorraxdii oo kale ah – oo xadiithkii Cubaada waad xusuusataan - (وأن لا ننازع الأمر أهله إلا أن تروا كفرا بواحا عندكم من الله فيه برهان) - gaalnimo cad oo loo jeedo weeye, ma ahan wax uu qof jaahil ah iska ta'wiishado.**

**Ninka Xajjaaj la yiraahdo waan garanaynaa, wuxuu ahaa nin aad u kharriban – waa ninka dilay Ibnu Zubeyr. Waxaa la dagaallamay ninka la yiraahdo Ibnu Ashcath iyo rag kale oo fara badan.**

**Saxaabadii markaa joogtay way inkireen dagaalka ay la galayaan ninkaas kharriban oo dhiigga daadiya. Ibnu Cumar waagaas xitaa wuu diiday in lala mubaayacoodo; wuxuu yiri aniga sababtay calaacal dhiig ah oo qof muslim ahi leeyahay loo daadin mayo, si kastaba arrintu ha ahaatee arintaas waxa ay ku dhammaatay waa la wada og yahay taariikhdee, ibnu Ashcath iyo raggii la socday oo aad u fara badnaa oo jeysh xoog leh ahaa waa la jabiyay oo waa laga adkaaday; dad far abadan buu ka dilay raggaas kuwa kalana wuu iska dhaafay.**
**Iyadoo sidaas ay tahay haddana Ahlu-Sunnihii ma aanay takfiirin ninkaas, mana aanay dhihin halagu khuruujo.**

**Abuu Usaama waxaa laga wariyay in nin sufyaan la joogay uu yiri:**

**(أتشهد على الحجاج وعلى أبي مسلم الخراساني من أمراء الجور أنهما في النار)**

**Sufyaanow: maka marqaati kacaysaa Xajaaj iyo Abuu Muslim oo madaxda dulmiga badan ka mid ahaa in ay naar gelayaan, markaas buu sufyaan ka diidoo wuxuu yiri: (لا إن أقرا بالتوحيد) maya hadday towxiidka qiraan naar ayaan ugu marag**

**kici ha dhihin; naar buu illaa iyo illaa geli ha dhihin; waa wax Allaah gacantiisa ku jira taasi.**
**Haddii Amiirku macsi ku faro, Ahlu-sunnuhu wuxuu qabaa, sunnaduna ay sheegaysaa, shakina aanu ku jirin in aan lagu adeecayn. Haddiise uu macruuf ku faro, in lagu adeeco ayaa waajib ah, waxaa lagu diidayaahi waa macsi.**

**– السمع و الطاعة حق على المرء المسلم فيما أحب أو كره ما لم يؤمر بمعصية فإذا أمر بمعصية فلا سمع عليه و لا طاعة**[1].

(**السمع و الطاعة**) ayuu yiri Rasuulku ﷺ yaa (**حق**) ku ah oo saaran (**على المرء المسلم**) qofkii muslimka ahaa (**فيما أحب أو كره**) wixii uu jecel yahay iyo wixii uu dhibsanayaba ( **ما لم يؤمر بمعصية**) haddii aan macsi la farin (**فإذا أمر بمعصية فلا سمع عليه و لا طاعة**) haddii qufkii macsi la faro samci iyo daaco kuma laha oo markaas ku adeeci mayo macsidii. haddaba macsidii ku adeeci maayo macnaheedu ma ahan in daacadii oo dhanba ay burayso; oo wixii kale oo macruuf ah oo mubaax ah ama daaca ah waa lagu adeecaayaa; macsida uun baan lagu adeecayn.

Waxaa marka aad laysugu khilaafay nimanka xukaamta ah ee hadda jooga, aad dadku u diideen in axkaamtaas ay qaataan. Ahlu-sunnaha loo qaateenka ah iyo dadka ahlu cilmiga ahi waxay leeyihiin: ninka xaakimka ah hadduuba muslim yahay; oo shuruuddii laga hayo in la adeecaayo, salaaddiina wuu tukanayaa muslimna wuu yahay laakiin danbiyo ayuu sameynaayaa; macaasidaas darteed iyo kabaa'irtaas uu samaynayo darteed diinka ayuu uga baxay daacana malaha dhihi maayaan.

Waxaa marka mushkilo ah, daacadii xukaamtii maamulaysana waa la diiday; waxaadna arkaysaa iyadoo jamaacooyin la samaystay, oo mararka qaarkood dad aan la aqoonninba ay xukumaan amaba magacooda bannaanka aan soo dhigi karin, oo haddana la leeyahay daacadoodu waa idinku waajib; haddii aad khilaaftaan sidaas iyo sidaas ayaa dhacaysa; waa nasiib darro taasi.

Ibnu taymiyah kitaabkiisa Minhaaj Assunnah wuxuu ku leeyahay:

**إن النبي ﷺ أمر بطاعة الأئمة الموجودين المعلومين الذين لهم سلطان يقدرون به على سياسة الناس لا بطاعة معدوم ولا مجهول ولا مَنْ ليس له سلطان ولا قدرة على شيء أصلا**[2].

Nabigu ﷺ wuxuu dadka faray in ay adeecaan nimankii madaxda ahaa ee joogay ee la garanaayay ee lahaa awood ay wax ku maamulaan. Rasuulku ﷺ ma aanu farin in ay adeecaan nin aan joogin – waa sida shiicada oo kale – (**ولا مجهول**) nin aan la aqoonnin (**ولا من ليس له سلطان**) iyo qof aan awood lahayn (**ولا قدرة على شيء أصلا**) wax qudra ah aanay jirin, in layska caleema saarto oo la yiraa ninkaas ayay daacadiisu nagu waajibtay ma aha; taasi marka ma bannaana.

Haddaba, waxyaalihii caamka ahaa; oo ummadda maslaxadeedii ay ku jirtay; oo ay iyagu tartiibinayeen; sharcigana aan khilaafsanayn, in lagu waafaqaa iyaduna waa

(١)– انظر: صحيح الجامع حديث رقم : ٣٦٩٣.

(٢)– منهاج السنة النبوية ١١٥/١.

mashruuc. Haddaba wixii iska bannaanaa ama sunno ahaa daacadoodu iguma waajibto la dhihi mayo.

Haddii Allaah uu noo sahlo nin madax ah, oo arkaantii iyo shuruuddii imaamada laga helay, in la ictiqaadiyo inuu beeco kugu leeyahay oo daacadiisu waajib kugu tahay in aad rumayso ayay sunnadu faraysaa. Laakiinse ma aha in uu qofku markii horaba hawadiisa uu raaco, ama caqlaani iska yahay oo ra'yigiisa kaliya ku socdo; uu leeyahay aniga ninkii I cajabiyana waan adeecayaa, haddii kalana dagaal bay noo tahay, taasi ma aha mid sunnada waafaqsan.

Rasuulku ﷺ waxuu ku leeyahay xadiithkii Cowf ibn Maalik alAshjaci uu wariyay:

<<أَلاَ مَنْ وَلِيَ عَلَيْهِ وَالٍ فَرَآهُ يَأْتِى شَيْئًا مِنْ مَعْصِيَةِ اللَّهِ فَلْيَكْرَهْ مَا يَأْتِى مِنْ مَعْصِيَةِ اللَّهِ وَلاَ يَنْزِعَنَّ يَدًا مِنْ طَاعَةٍ »[١].

Qofkii uu nin madax u noqdo, oo arka ninkii madaxda ahaa oo macsi la imaanaya, macsida ha noco, lakiinse daacadii yuusan ka bixin.

**عن أبي سلام قال : قال حذيفة بن اليمان قلت يا رسول الله إنا كنا بشر فجاء الله بخير فنحن فيه فهل من وراء هذا الخير شر ؟ قال ( نعم ) قلت هل من وراء ذلك الشر خير ؟ قال ( نعم ) قلت فهل من وراء ذلك الخير شر ؟ قال ( نعم ) قلت كيف ؟ قال ( يكون بعدي أئمة لا يهتدون بهداي ولا يستنون بسنتي، وسيقوم فيهم رجال قلوبهم قلوب الشياطين في جثمان إنس ) قال: قلت: كيف أصنع يا رسول الله إن أدركت ذلك ؟ قال: (تسمع وتطيع للأمير، وإن ضرب ظهرك وأخذ مالك، فاسمع وأطع)** [٢].

Waxaa kaloo Muslim uu wariyay Xudeyfa ibnu alyaman uu ka wariyay in uu Rasuulku yiri ﷺ : niman baa imaan doona gadaashey oo aan hanuunkeygii ku dhaqmaynin, oon sunnadayda qabsanaynin, ragbaana ka dhex istaagi doona qalbiyadooduna qalbiyo shaydaan ay yihiin laakiin dadka jirkoodii leh, markaas buu wuxuu yiri: maxaan sameeyaa haddii taasi i qabsato? Rasuulku ﷺ wuxuu yiri : **(تسمع وتطيع للأمير)** ninkii madaxda ahaa yaad adeecaysaa oodna maqlaysaa, **(وإن ضرب ظهرك وأخذ مالك فاسمع وأطع)** yacnii dhabarkaagaba ha garaacee xoolahaagana ha qaatee daacaa lagaa rabaa ayuu yiri Rasuulku ﷺ

Ibnu taymiyah wuxuu lee yahay :

**وأما ما يقع من ظلمهم وجورهم بتأويل سائغ أو غير سائغ فلا يجوز أن يزال لما فيه من ظلم وجور كما هو عادة أكثر النفوس تزيل الشر بما هو شر منه وتزيل العدوان بما هو أعدى منه.**

**فالخروج عليهم يوجب من الظلم والفساد أكثر من ظلمهم فيصبر عليه كما يصبر عند الأمر بالمعروف والنهى عن المنكر على ظلم المامور والمنهى فى مواضع كثيرة كقوله: (وأمر بالمعروف وانه عن المنكر واصبر على ما أصابك )وقوله: (فاصبر كما صبر أولوا العزم من الرسل) وقوله: (فاصبر لحكم ربك فانك بأعيننا)**[٣].

---

(١)- صحيح مسلم، باب خيار الأئمة وشرارهم ٢٤/٦.

(٢)- صحيح مسلم، باب وجوب ملازمة الجماعة ١٤٧٥/٣.

(٣)- مجموع الفتاوى، باب الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر، ١٧٩/٢٨.

Dulmiga madaxda in loo sabro waa (من أصول أهل السنة والجماعة) waa asal usuusha ahlu-sunna wal-jamaaca ka mid ah ayuu yiri, maxaa laga faa'iidi taas? Waxaa laga faa'iidayaa masaa'il farabadan ayaa ku imaanaysa. Ibnu taymiyah wuxuu leeyahay: waxa dulmigooda ama jowrkooda oo dhacaya, ta'wiil maqbuula haku sameeyaan ama mid aan maqbuul ahayne, ma bannaana in la zuuliyo oo la yiraahdo waan ka takhalusaynaa nimankan si aan dulmiga uga takhalusno; marka iyada lafteeda ayaa dulmi ah sida dadka badankood caadadoodu ay tahay (تزيل الشر بما هو شر منه) sharta dadku waxay ku zuuliyaan mid kasii daran (وتزيل العدوان بما هو أعدى منه) xadgudubkana waxay ku zuuliyaan mid kasii daran.

Sheekhu waxa uu leeyahay: (فالخروج عليهم يوجب من الظلم والفساد أكثر من ظلمهم) ninkii madaxda ahaa in lagu baxo waxaa ka dhasha dulmi iyo fasaad ka daran midkii ay iyagu samaynayeen.

( فيُصبر عليه كما يصبر عند الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر على ظلم المامور والمنهي فى مواضع كثيرة )
waa la isaga dulqaataa sida qofka aad macruufka farayso munkarkana ka reebeyso hadduu xoogaa dulmi ah la yimaado iyo wax aan munaasab ahayn meelaha qaarkood loogu dulqaadanayay.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, axaadiithtii waa taas, nusuustii a'immadana waa taasaa, arrin aad u xun oo weliba kufri ah oo (القول بخلق القرآن) ah, markii ay dhacday, Imaamu Axmad waa loo yimid waxaa la yiri : Imaam Axmadow annagu waxaannu kuugu nimid in aan ku war gelinno nimankan aan rabno in aan la dagaallanno, maxaa yeelay ilmaheenni ayaan u baqaynaa oo Islaamkeenni baa baaba'aaya, hadaanay ilmihii maqal xaqii oo baadilkan kaliya ay ku barbaaraan, marka imaamu Axmad wuu ka diiday, wuxuuna yiri : Islaamku waa diin, Allaana diinkiisa u gargaaraya; oo diinku wuxuu leeyahay Rabbi u gargaara, kama aanu yeelin arrintii. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Allaah ummaddii waa ku dhowray taa, oo waxaad og tihiin markii arrintiisii ay qaateen kadib ninkii madaxda ahaa waa uu dhintay, mid kalaa yimid; nin macquul ah ayuu noqday; oo sunnadii u gargaara.

Marka Imaam Axmad dagaal ayuu ka digay oo wuxuu yiri: (الدماء الدماء) anigu dhiig daadiya idin ma lihi waana idinkaga digayaa. Wuxuu yiri : in aad ku sabartaan yaa idiin wanaagsan, oo qlabiga aad ka inkirtaan (وَلَا تَخْلَعُوا يَدًا مِنْ طَاعَة وَلَا تَشُقُّوا عَصَا المسلمين) daacada imaamka ha ka bixina, muslinkana ha kala geynina.

(ولا تَسْفِكُوا دِمَاءَكُمْ وَدِمَاءَ الْمُسْلِمِينَ مَعَكُم) dhiigiinna iyo dhiigga muslimiinta hadaadinnina ayuu yiri (وَانْظُرُوا فِي عَاقِبَةِ أَمْرِكُمْ) cirib danbeedka arrinkiinna bal fiiriya; oo ka fekera, (وَاصْبِرُوا) iskana sabra (حَتَّى يَسْتَرِيح بَرٌّ) ilaa uu ka raaxeysto nin baarriya oo wanaagsan (أَوْ يُسْتَرَاح مِنْ فَاجِر) ama kii faajirka ahaa laga raaxeysto – in uu iska dhintaaba dhici karta – (وَقَالَ لَيْسَ هَذَا صَوَاب) kaasi sax ma aha buu yiri; in aad ninkan ka takhallustaan oo tiraahdaan waan ku khuruujaynaa [1] (هَذَا خِلاف الآثَار) axaadiithtii waxa ay na faraysay arinkani waa uu khilaafsan yahay, marka kama aanu yeelin Imaamu Axmad.

(١)- الآداب الشرعية، ١/٢٤٩.

Mas'aladu waa mas'alo axaadiithtii saas ugu cad, culumada islaamkuna caqiidadooda ay ku soo dareen, axaadiiththeeduna ay mutawaatir tahay oo aanu shaki ku jirin. Haddaba ictiqaadka noocaas oo kale ah in uu ictiqaadiyo ayaa loo baahan yahay; oo aanu iska ictiqaadin, ictiqaadkii khawaarijta; ninkii saan rabno aan ahayn; muwaasafaadkaan annagu rabnay aan la imaannin waa uun daagaal bay noo joogtaa marwalba qofku dhihine, maslaxada muslimiinta oo caamka ah uu ka fekero, iyo waxa wanaaga oo laga heli karo markii fitanka la iska dhaafo iyo diinka ku baaqi noqonaaya; oo dadkii Allahahoodii caabudaayaan; oo danahoodii qabsanaayaan (**وبالله التوفيق**).

# b- Maxaa u dhexeeya jihaadka iyo fitnada?

***Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud***

## بسم الله الرحمن الرحيم

Waxaa farqi noogu filan in aan ogaanno sidii saxaabadii iyo taabiciintii iyo salafkiiba ay u haysteen fitna waxa ay tahay iyo jihaad waxa uu yahay oo ay labadooda u kala sooci jireen.

Imaamu muslin saxiixiisa wuxuu ku wariyay in usaama ibnu zayd uu yiri rasuulka Allaah (ﷺ) wuxuu noo diray Qabiilada (الحُرَقات) la yiraahdo oo juhayna ka mid ah; markaas bay naga war heleen; markaas bay carareen, nin ka mid ah baan soo gaarnay, markii aan dul nimid buu wuxuu yiri (لا إله إلا الله) markaas baan warmeynay ilaa aan dilnay. Markaas baa xoogaa naftayda wax galeen.
Rasuulkii (ﷺ) baan arrinkii soo gaarsiiyay.
Oo sideed yeelaysaa buu yiri (ﷺ) (لا إله إلا الله) maalinta yoomulqiyaamo?

Markaas baan waxaan ku iri rasuulki Allow : ninkaani (لا إله إلا الله) wuxuu u yiri hubka uu ka cabsanaayo dartii.
Markaas buu wuxuu yiri rasuulku (ﷺ) (أفلا شققت عن قلبه) maxaad qalbigiisa u jeexi wayday (حتى تعلم) si aad u ogaato (أقالها) in uu u yiri sidaas iyo in kale.
Markaas buu yiri haddana rasuulku (ﷺ) : (كيف لك بلا إله إلا الله؟) oo sideed ka yeelaysaa (لا إله إلا الله) Yoomulqiyaama? Markaasuu Rasuulku (ﷺ) ku celceliyay hadalkii, ilaa aan ka jaclaystay buu leeyahay usama inaanan islaamin maalinkaas ka hor.

Abuu dabyaan yaa wuxuu leeyahay : Sacad binu abii waqaas baa wuxuu yiri :
(وأنا والله لا اقتله حتى يقتله ذو البطين) aniguna wallee inaanan qofna dilin ilaa uu ninkaasi wax dilo, Usaama ayuu ka wadaa (ذو البطين).

Nin baa marka wuxuu yiri isagoo sacad la hadlaya - Sacadna waxaan garanaynaa Cali Bin Abii Daalib markii laga soo reebo, saxaabada waqtigaas joogtay asagaa ugu fadli badnaa –: أليس قد قال الله Miyaanu Allaah dhihin : (قاتلوهم حتى لا تكون فتنة) la dirira ilaa aan fitna ka dhicin? **Sacad** baa wuxuu yiri: فقد قاتلناهم حتى لم تكن فتنة annagu gaaladii waan la dagaallannay ilaa fitna aanay dhicin oo ay baaba'day
وأنت وأصحابك تريدون أن نقاتل حتى تكون فتنة
adiga iyo kooxdaaduna waxaad doonaysaan inaan dagaallanno ilaa fitna ay ka dhacdo.

Bukhaaribaa saxiixiisa wuxuu ku wariyay; in ay laba nin u yimaadeen ibnu cumar - waqtigii ibnu Zubeyr ay fitnadu jirtay – markaas bay ku yiraahdeen
إن الناس قد صنعوا ما ترى : war dadku waxay ku dhaceen waxa aad u jeeddo,

وأنت ابن عمر بن الخطاب adiguna wiilkii Cumar binu Khaddaab uu dhalay baad tahay, saaxibkii rasuulka Ilaahay baad tahay, فما يمنعك أن تخرج oo maxaa kuu diidaya in aad soo baxdo oo aad howsha qabato?
wuxuu yiri : waxaa ii diidaya أن الله حرم عليّ دم أخي المسلم in Allaah uu iga xarrimay dhiigga walaalkayga muslimka ah.
ninkii baa wuxuu yiri : ma waanu Allaah dhihin (وقاتلوهم حتى لا تكون فتنة) la dagaallama ilaa fitna aanay ka dhicin (ويكون الدين كله لله) diinka iyo daacadduna Allaah u sugnaato.
wuxuu yiri : annagu gaalada waan la dagaallannay حتى لم تكن فتنة ilaa fitna aanay ka dhicin oo ay baaba'do وكان الدين لله diinkina Allaah u sugnaaday iyo daacaddiba
وأنتم تريدون أن نقاتل حتى تكون فتنة ويكون الدين لغير الله adinkuna waxaad doonaysaan inaan dagaallanno ilaa fitna ay ka dhacdo oo diinkii iyo daacaddiina Allaah cid aan ahayn ay u sugnaadaan.

Bukhaari wuxuu saxiixiisa ku wariyay in nin u yimid ibni Cumar markaas buu ku yiri
يا أبا عبد الرحمن ألا تسمع ما ذكر الله في كتابه { وإن طائفتان من المؤمنين اقتتلوا }
oo mawaadan maqlayn waxa Allaah Qur'aankiisa ku sheegay: haddii laba kooxood oo muslimiinta ka mid ahi ay dagaallamaan, aayadda ayuu marka ishaarayaa adiga maxaa kuu diidaaya in aad dagaallanto? siduu Allaah kitaabkiisa ku sheegay. - Aayad ayaa la daliilsanayaa, macnaheedana la fiirin maayo sida inta badan ba dhacda -.
wuxuu yiri : Adeerow أعير بهذه الآية in aayadan la igu caayo ولا أقاتل oo aanan dagaallamin, ayaa أحب إلي aan ka jecelahay من أن أعير in laygu caayo aayaddi tan horteed Allaah ku yiri : ومن يقتل مؤمنا متعمدا فجزاؤه جهنم qofkii qof mu'mina dila, asagoo kas u dilaya, abaalmarintiisu waa jahannama uu galo, خالدا فيها asagoo ku waaraaya dhexdeeda, وغضب الله عليه Alla baa u carooday, ولعنه naxariistiisana wuu ka fogeeyay, وأعد له عذابا عظيما cadaab waynna waa u diyaariyay. Aayaddan in laygu caayo ayaa iiga daran buu leeyahay in tii kale laygu caayo.

Ninkii baa haddana wuxuu yiri: فإن الله قال: قاتلوهم حتى لا تكون فتنة Aayaddaas sow Allaah ma dhihin La dagaallama inta fitna laga weynaayo?
Ibnu Cumar baa wuxuu yiri: قد فعلناه waan smaynay, oo gaaladii waan la dagaallannay ilaa fitnadii ay baaba'day, Islaankuna wuu yaraan jiray وكان الرجل يفتن عن دينه qofka diinkiisa ayaa laga fitnayn jiray, إما أن يقتلوه أو يوثقوه حتى ظهر الإسلام ولم تكن فتنة arrintu waxay ahayd gaaladu in ay dilaan ama ay xirxiraan qofkii soo islaama, ilaa uu islaamkii ka soo muuqday; oo uu ka xoogaystay, fitnadiina meesha ay ka baxday. markuu niinkii arkay inaanu warka ka yeelayn ayuu wuxuu yiri: فما قولك في علي وعثمان رضي الله عنهما bal Cali iyo Cuthmaan ka warran? Markaasuu ibnu Cumar wuxuu yiri : Cuthmaan Allaah ayaa cafiyay idinkuna waad dhibsateen in uu cafiyo. Calina waa ina adeerka Rasuulka (ﷺ) waana wiilka gabadhiisa qabay, gurigiisana waa kan oo waad u jeeddaan.

Saciid ibnu Jubeyr baa waxaa laga wariyay, Ibnu Cumar baa noo soo baxay annagoo doonayna in uu xadiith wanaagsan nooga warramo, nin Xakiim la yiraahdo baa soo maray, markaas buu wuxuu yiri: Abaa Cabdiraxmaanow – waa kunyadii Ibnu Cumare - كيف ترى في القتال في الفتنة oo maxaad ka aamminsan tahay in fitnada dhexdeeda la dagaallamo? Ibnu Cumar wuxuu yiri :وهل تدري ما الفتنة ثكلتك أمك؟ fitnada ma garanaysaa? hooyadaa ku waysaye?

كان محمد صلى الله عليه وسلم يقاتل المشركين وكان الدخول في دينهم فتنة، وليس قتالَكم على الملك

Nabigu (ﷺ) gaaladuu la dagaallami jiray, in la galo diinkooda ayaa fitna ahayd boqortooyadaan iyo xukunkan aad u dagaallamaysaan ma ahayn arrinku.

Bayhaqi ayaa sunankiisa wuxuu ku wariyay, in Cabdullahi ibnu Zubeyr iyo Cabdullaahi ibnu safwaan ay maalin Xijriga kacbada fadhiyeen, markaas ayaa ibnu Cumar soo maray isagoo dawaafaya, markaas baa midkood midka kale ku yiri: war ninkan nin ka fadli badan miyaad waqtigan hadda jira garanaysaa?
Markaa nin bay waxay ku yiraahdeen noogu yeer hadduu dawaafka dhammaysto. Dawaafkii markuu dhamaystay oo laba ragcana uu dukaday baa ninkii la soo diray u yimid, markaas ayuu wuxuu ku yiri : ibnu Zubeyr iyo Cabdullaahi ibnu Safwaan baa kuu yeeraya, waa u yimid.
Cabdullaahi ibnu Safwan baa wuxuu ku yiri: Abaa Cabdiraxmaanow maxaa kuu diidaaya in amiirulmu'miniinka aad la mubaayacooto? – ibnu Zubeyr buu ka wadaa – reer xijaaz, reer Ciraaq iyo reer Shaamba way la mubaayacoodeene, markaas buu yiri.

والله لا أبايعكم وأنتم واضعو سيوفكم على عواتقكم تَصَبَّبُ ايديكم من دماء المسلمين

anigu idinla mubaayacoon mayo idinkoo seefihiinna deegta saartay oo gacmihiinna ay ka daadanayaan dhiiggii muslimiinta.
Sunan kii waynaa ee Bayhaqi waxaa lagu wariyay in nin la yiraahdo Saciid ibnu xarbi Al Cabdi uu yiri : Ibnu Cumar baan la fadhiyay Masjidul Xaraam oo Kacbadii ah waqtigii Ibnu Zubeyr waxaana markaa xugunkiisa ku hoos jiray madaxdii Khawaarijta; Naafic ibnu Alarzq iyo Cadhiya inbu Al aswad iyo Najdah, markaas bay nin dhallin yara ah u soo direen ibnu Cumar.
Waxay ku yiraahdeen maxaa kuu diidaaya in aad ibnu zubeyr la mubaayacooto oo amiirulmu'miniin ah?
Markaas buu wuxuu yiri ibnu Cumar :

والله ما كنت لأعطي بيعتي في فرقة ولا أمنعها من جماعة

anigu beycadayda dhiibi maayo iyadoo ay jirto inuu muslimku is khilaafsan yahay – Umawiyiinta ayaa khilaafsanaa Ibnu zubeyr oo shaam meel ka mid ah haystay, haddii ay wada jiraanna kii diida ma ahi. – markii Cabdilmalik ibn marwaan arrintii isugu dubba dhacday oo xugunkii isagu la wareegay oo dadkii wada adeeceen buu waraaq beyca ah u diray.

Bukhaari wuxuu saxiixiisa ku wariyay, in **Abulminhaal** yiri: waqtigii **ibnu Ziyaad** ayaa waxaa shaam ka soo baxay **Marwaan**, **Ibnu Zubeyrna** Makkah ayuu ka soo baxay, **Qurraa'duna** Basra ayay ka soo dhaqaaqeen. Markii ay arrimahaas dhaceen ayaa غُمّ أبي غمَّاً شديداً aad buu u murugooday ayuu leeyahay aabbahay, markaas ayuu wuxuu yiri انطلق لا أبالك nasoo dhaqaaji ninkan aan aadnee oo asxaabta rasuulkii ka mid ah – Abuu barzah Al-aslami ayuu ka wadaa – markaas baan la soo baxay, oo aan u soo galnay asagoo gurigiisa jooga Abuu Barzah, meel sare ayuu saarnaa, maalin aad u kululna way ahayd. Markaas ayaan la fariisannay, markaas ayaa aabbahay warkii ka

dhuray oo ka dalbay, oo markaas yiri: abu Barzow mawaadan u jeedin waxa dhacaya? Warkii ugu horreeyay ee uu abuu barzah ku hadlay wuxuu ahaa: Allaah ayaan uga ajar raadsanayaa in aan noqday mid u caraysan qolooyinkan Quraysheed; carabay xaalad xun baad ku jirteen jaahiligii, waad yareydeyn dullina waad ahaydeen waad liidateen, baadina waad ku sugneydeen, Allaa islaankan idinku badbaadiyay iyo Muxammad oo kor buu idiin qaaday ilaa meesha hadda aad joogtaan aad gaarteen. Adduunyada ayaa dhexdiinna fasahaadisay; ninkaas Shaam jooga oo Marwaana, Wallaahi Adduunyo uun buu u dagaallamayaa, ninkaa Makkah joogana Adduunyo uun buu u dagaallamayaa, kuwa idinka idinla joogana, oo quraa'ada aad ku magacawdaan Adduunyo uun bay u dagaallamayaan.
Markii uu qofna dhaafi waayay, ayaa aabbahay ku yiri: maxaad na faraysaa hadda, markaasuu wuxuu yiri: waxaa dadka ugu wanaagsan qolo ay caloolahoodu ka maran yihiin xoolaha dadka, Dhabarkooduna dhiigga muslimiinta uu fudayd ka yahay; oo aanu dhiig muslim cusleynayn.

Bayhaqi baa sunankiisa wuxuu ku wariyay, Marwaan ibnu Xakam baa wuxuu ku yiri nin Ayman ibnu Khuraym la yiraahdo: war mawaadan nala dagaal gelayn? Markaas buu wuxuu yiri: aabbahay iyo adeerkay baa Badar ka qaybgalay, anigana ballan bay ila galeen oo waxay igu yiraahdeen : qof (لآإله إلا الله) leh hala diririn. Marka Marwaanow hadii aad ii keento dammaana qaad in aan ka badbaadayo naarta waan kaala qaybqaadanayaa dagaalka, markaasuu yiri: war naga tag balaayo kugu dhacdaye.Ninkii waa iska baxay asagoo leh :

وَلَسْــــتُ بِقَاتِـــلٍ رَجُـــلاً يُصَلِّـــى عَلَـــى سُـــلْطَانِ آخَـــرَ مِـــنْ قُرَيْـــشِ
لَـــهُ سُـــــلْطَانُهُ وَعَلَـــىَّ إِثْمِـــــى مَـــعَاذَ اللَّـــهِ مِـــنْ جَهْـــلٍ وَطَـــيْشِ
أَأَقْــتُلُ مُسْــلِمًا فِــى غَيْــرِ جُــرْمٍ فَلَـــيْسَ بِنَـــافِعِى مَـــا عِشْـــتُ عَيْشِـــى

anigu nin dukanaya oo muslin ah dili mayo oo u dili mayo nin kale madaxtinnimadiisa oo reer quraysheed ka mid ah, madaxtinnimada asagaa iska leh danbigana aniguu igu soo hari - waa meesha laga yiraahdo oo kale ma liibaanayaasha lagu liibaanay – Allaan ka magan galay jaahilnimo iyo fudfudeyd. Ma qof muslin ah ayaan iska dilaa isagoon danbi galin? Miyaan iska dilaa? I anfici mayso noloshaydu inta aan noolahay.

**Jihaadkuna waa maxay?**
Waa in dadaal dheer lagu bixiyo gaalada la dagaallankooda; si kalimadda Allaah kor u noqoto, iyada oo ay shuruuddu dhamaystiran tahay; oo ay muslinku xoog leeyihiin oo madaxna leeyihiin oo ay isku nadaamsan yihiin, oo uu xooggoodu ka aga dhow yahay midka gaalada oo meel la yaqaanna ay joogaan, oo raasumaalkoodu dhowrsoon yahay oo aanay baabi'in ka baqayn, marka xaaladdu noocaas oo kale ay tahay oo ay gaalada iska dhicin karaan, oo ay ribix raja ka qabaan markaas bay dagaallamayaan oo gaalo iyo dalabkooda u qasdaayaan. Jihaadku waa midka noocaas oo kale ah, ee ma ahan mid dad dhuumanaya oo bannaanka aan isa soo dhigi karin, tabar yari darteed ay wax juqeeyaan oo xabbada ridridaan dadka masaakiinta ahna markaas madaafiic lagu garaaco. Kaasi ma ahan jihaadkii la yaqaannay. Haddii aan tabar la hayn in la sabro ayaa mashruuc ah. Haddaba salafkii sidaas ayay u arkayeen waxa fidnada la yiraahdo iyo waxa jihaadka la yiraahdo, sidaas ayay ugu kala soocnaayeen.

Wabillahi tawfiiq.

## c- shabaabka ma taageeri karaa?

***Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud***

walaal alshabaab waa koox arrimihii muslinka u dhexeeyay rabta in ay la keli noqoto, waxaan ka wadaa xagga maamulka dowladnimo oo ay waajib tahay inuu ku yimaado si wada tashi ah, oo ahlulxalli walcaqdigu wada go'aamiyaan.

Iyagu waa kuwa amiir gaar ah sameystay oo lugu magacaabo mukhtaar abuzubeyr.

Muslinkana in kooxo kooxo xukun isku haysta loo kala gooyo ma bannaana, oo aaydo iyo axaadiith badan ayaa arrintaa diidaya. Waxaad arrintaa ugu noqotaa kitaabka la yiraahdo ***<u>ataxdiir mina tafarruqi walxizbiyah</u>***.

xukun doonkaasi wuxuu ku riixay inay gaalnimo ku xukumaan kooxo kale oo ay fikir ahaan kala duwanaadeen, sida Shariif sheekh Axmad maalin dhoweyd lugu gaaleysiiyay inuu gaalo la fariistay, gaalnimo ku xukminta dadka muslimka ah waa arrin khatar badan oo diinkaada dhaawac weyn u geysanaysa haddaad ku qaldanto.

Nimankan waa niman caadifad iyo xamaasad wax ku dhisa, iyo video yaal la fiirsado, muslinka gaalo ku gummaadeyso, ama dad shabaabku ku daydaan oo dad muslin ah laynaya ama gowracaya.

Waxaana culimo u ah:

Abuuqataada al falstiini oo ingiriiska ku nool luguna yaqaan fatwadiisi caanka ahayd ee uu ku bannaynayay in saqiirrada lugu gowrici karo aljeeriya, fitnada halkaas ka socotana dadka huriya kuwa ugu waaweyn ku jira.

waxay kaloo sheekh u haystaan Abuumuxammad Almaqdasi (cisaam alburqaawi), kana mid ahaan jiray marki hore kooxda muxammad suruur, kadibna ay iska ceyriyeen markii uu ku tarax tegay gaaleysiinta muslinka iyo in dhiiggooda la banneysto, waana ninka allifay alkawaashifuljaliya fii takfiiridowladti sucuudiya, oo jahli iyo talaxtag ku dhisan. waxaa kale oo culumo u ah ayman aldawaahiri iyo usaama binlaadin oo ay dadka ku colaadiyaan haddaan la xushmeyn.

Shabaabku waxay qayb ka yihiin dadka qaba in aanay muslinku dhibka ka baxayn haddaanay u wada istaagin la dagaallanka maraykanka, iyada oo aan la fiirinayn awooddoodu taa ma gaarsiisan tahay mise maya.

waxay wadaan shabaabku is qarxin, ku dhufo oo ka dhaqaaq, oo aan laga fiirsan muxuu sharcigu ka qabaa arrintaas, dhibkeeda iyo dheefteeda yaa badanna aan dan laga gelin.

Shabaabka waxaa lugu bartay in ay qofka ay gaalnimada ku xukumaan hadday u sahlanaato ay khaarijiyaan. shaqada ay waddanka ka qabanayeen xabashida soo gelitaankeedi ka dib iyo ka hor ba waxaa u badnaa laynta dadka ay ku sheegaan inay yihiin murtaddiin, iyo basaasiin. xad dad laga oofiyaana waxay u baahan tahay dowlad iyo in si saxa loo sugo xaalku sida uu yahay, haddii kale arrintu waxay noqonaysaa jaantaa rogan, iyo qof waliba inuu gaaleysiiyo ka dibna khaarijiyo qofkuu doono. taasina adduunyo iyo diinuba ku dhaqnaan mayaan, oo ammaan la heli maayo.

Qofka muslinka ahina waa midka ay muslimiintu ka nabad galaan afkiisa iyo addinkiisa sida Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) uu sheegay.

Abuumansuur al bagdaadi wuxuu ku yiri kitaabkiisa usuuluddiin 340: dadka aan madaxda ahayni xaq uma lahan in ay murtad dilaan, oo xad ka oofiyaan.

Ibnutaymiyana wuxuu ku yiri kitaabkiisa mukhtasarul fataawaa almisriya 580: Qofna xaq uma lahan inuu munkarki ku suuliyo si ka xun sidii hore, sida in qof intuu istaago yiraahdo tuuggaan gacanta goynayaa, khamriya cabka ayaan karbaashayaa, xuduudda ayaan fulinayaa, maxaa yeelay hadduu sidaa yeelo xumaan iyo dhiig daata ayaa ka dhalanaya, oo qof walba intuu qofka kale nabar ku dhufto ayuu leeyahay waa uu mutaystay, haddaba waa in arrinkaa looga danbeeyo ninka ummadda u madaxda ah iyo dadka uu u xilsaarto arrimahaas.

isku soo duuboo barnaamijka ay shabaabku qaybta ka yihiin ee caalamiga ah ma ahan mid muslinka maslaxad u sida, oo qaraxyadi maraykan lugu sameeyay muslinku wax aan luggooyo ahayn kama dhaxlin iyo in noloshi lugu ciriiriyay, sumcaddi muslinkuna hoos u dhacday, jihaadkina la macna tiray oo lugu soo koobay gaalada dhib gaarsii wixi ka dhalanaahi ha ka dhasheene. Muslimkuna haddii ay fikraddan ku qancaan uma baahna inay caqiiddadooda saxaan, sharciga Alle naftooda ka billaabaan ku dhaqankiisa, midoobaan ama hub macna leh urursadaan, illeen waxaa lugu sheekeeynayaa jihaadba kuuma dhimmana haddii aad is qarxiso, ama miino meel ku aasto. Marka jihaadki macnaha lahaa ee kalmadda Alle kor ku noqonaysay ee muslinku aqoon jiray waa la beddelay oo la baabi'iyay.

Dowladdi Afgaanistaan yey sababsatay? Sow ma sababsan ninki maganta u ahaa, ee isagoo magan ah dagaal ku iclaamiyay Mareykan.

Dagaalki Rasuulka iyo saxaabadu qaadi jireen wuxuu ahaa mid barakadiisu muuqato oo ummada badani ku soo islaamayeen, gaaladana shartoodu ku yaraanaysay, aadaabtiisuna ay wanaagsan tahay oo gaalku uu garanayo waxa loola dirirayo, la leeyahay ama soo islaam ama jizya bixi, oo aan carruur iyo haween iyo duqow la laynayn. dagaalkana ay dowlado wadeen.

Muslinku ma aqoon jirin dagaal dadka hoggaaminaya ay qarinayaan bidhaantooda, magacooda, oo aan la aqoon meel loogu hagaago, hubki ugu xoogga badnaa ee la isticmaalay 11 september wuxuu ka badan waayay in la afduubo diyaarado rayad saaran yahay oo saaruukh laga dhigtay. marka haddaanu dagaalyahanku heysan hubki halkaa gaari lahaa shareecadu u bannayn mayso inuu khiyaano waddan uu fiiso ku soo galay oo aan dagaal ka filanayn, oo aan dhinaciisa cabsi ka qabin.

Diinteenna khiyaanada iyo gadrigu iyo ballan ka buxu waa danbi aad u weyn.

Haddaba walaalow waxaan kugula talinayaa inaadan nimankaa taageerin haddii aad aakhiradaada ka fekerayso.

Wassalaamucalaykum waraxmatullaah.

# d- xisbi in la sameeyo si khilaafadi loo soo celiyo ma bannaan tahay?.

ASALAAMU CALAYKUM 1 SIDA AAN OG NAHAY CAQIDA AHLU SUNA WALJAMEECA MAQABTO IN DACWADA LOO SAMEEYO NIDAAM XISBIYO IYO DAACADA AMIINRKA XARAKADA HADABA SU.AASHEYDU WAXAY TAHAY SIDEE BAA LAGU SOO CELINKARAA AL KHILAAFA MIN HAAJU NUBUWA SIDEE BAA SE LOGA HORTAGI KARAA QUWADA GALAADA HADAAN LA IS KAASHAN MIDAKALE XADIITH KII NABIGA SCW EE AHAA SADDEX QOF OO MUSLIMIIN AH HADAY SAFAR GALAAN MID IYAGA KA MID AH HA UNOQDO AMIIR AMA MADAX BAAN U RABAA TAFSIIR 2 CALAMUL ISLAAMI KHAASATAN AFGHANISTAN IYO FALASTIIN WAXA KA SOCDA MA JIHAAD BAA MISE FITNO 3 CULIMADA SOOMAALIYEED SIDA SH CUMAR FAARUQ SH MAXAMED CABDI UMAL SH MUSTAFE XAJI ISMAACIL MA XISBIYADAA MISE WAA SALAFIYADA 4 OSAMA BINLADEN MA HOGAAMIYE ISLAAMBAA MISE MA AHA

***Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud***

wacalaykumussalaam, su'aalahan qaar badan oo ka mid ah hore ayaan uga hadlay, kutub aan hore u qornay ayaa jirta, ataxdiir minatafarruqi walxizbiyah, mowqifulmuslim minal qitaali filfitan, xaqiiqatul muwaalaatil mukaffira, bal tusmooyinkooda fiirfiiri, waxaad ka heleysaa manhajonlinle.com, iyo maktabada.com

xadiithka ka hadlayay haddii safar la yahay madax ha la sameysto, waa arrin sharci ah, islaamkuna fowdo ma oggola, gaar ahaan marka safar la yahay, oo haddii aan la isla socon dhibaato weyn iyo halaag baa laga baqaa.

markase beled la joogo, haddii meesha dowladi ka jirto, dowladdaas baa wax nidaaminaysa, baahidi waqtigi safarka jirtay markaa ma jirto. Qofki ka shaqeeya in lugu baxo dowladdi muslim ah ee jirtana waa fitna wade, waana midkay sheegtay ummulmuminiin in nebigeennu ka beri noqday qofki diinkiisa gabalgabaleeya oo kooxo ka dhex sameeya.

Warkaasna waxay tiri markay aragtay kuwa ku buuqaya cismaan ibn caffaan. Sida uu weriyay alqaadii ismaaciil kitaabkiisa axkaamulqur'aan, shaadibina kitaabkiisa ictisaamka ku soo arooriyay.

Haddii aanay dowladi jirinna wax qarsoodi ah oo aad muslinki kale kala keli noqonayso oo ku saabsan xukunkooda iyo wixii u dhexeeyay dadka ee talo in lugu dhiso u baahnaa, luguuma oggola in aad ku tillaabsato.

Bukhaari wuxuu weriyay in nin yiri cumar hadduu dhinto hebel baan la mubaayacoonayaa oo aan caleema saarayaa, warkiibaa cumar la soo gaarsiiyay wuu ka xanaaqay wuxuuna yiri dadka ayaan ka dhex istaagayaa oo aan u khudbeynayaa si aan uga digo kuwa doonaya in ay arrimahooga boobaan.

Madina ayuu hadalkiisii dib ugu dhigtay marki ibnucabbaas sidaas kula taliyay, khudbadi ugu horreysay ee uu madina ka jeediyo ayuu arrinti ka sheegay kuna daray: qofkii qof kale la mubaayacooda iyada oo aan la tala weydiin muslinki kale, isagana lalama mubaayacoodo, kii kalena sidoo kale, waxayba naftooda khatar ku geliyeen in la dilo.

ibu athiir markuu arrintan danbe sharxayay kitaabkiisa nihaayada wuxuu yiri: sababta keentay inay halis u noqdaan in la dilo waa iyagoo ummaddi ka xanaajiyay markii ay beycadaa qarsoodiga ah la keli noqdeen.

Saddexdan waxyaabood ayaa tiirar u ah xizbiyada xun:

1- Jacayl iyo nacayb, xiriirin iyo goyn lugu saleeyo xisbi ku jiriddii ama taageeriddii.
2- Beyca ama cahdi (ballan) gaar ah oo muslinka lagala keli noqonayo.
3- Xukunki muslinka u dhexeeyay oo koox gooni ahi is xijiso, oo ay la gooni noqoto, ama siyaasad ha lugu raadiyo ama dagaal halagu raadiyee.

Saddexdaasi waa tiirarka ay xisbiyadu ku taagan tahay, sharcigana boos looga heli maayo.

Waxaana asal u ah in baadil la isugu kaalmeeyo, camal ama qowl ba.

Dadkana loo sameeyo xisbi ama qof la leeyahay gar iyo gardarraba ku taageera.

Haddaba khilaafa islaami ah waxay ku imaanaysaa in towxiidki dadka la baro, maxaa yeelay khalad badan baa la galaa ama wax lugu hadlo ha noqdo ama wax la sameeyo e, ummaddeenna waad og tahay in owliyo tuuggu ku badan yahay, iyo bidcooyin kalaba, iyadoo ay arrini sidaas tahay qofki yiraahda khilaafa ayaan raadinayaa waa ay iska muuqataa inaanay ahayn mid dariiqi Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) ku taagan.

Owliyo tuug qofki ku fidneysan, waxaan ugu yeerayaa bal inuu daalacdo aayadahan soo socda:

Ancaam:40-41, Yuunus:18-22, luqmaan:32, Gaafir:60, Axqaaf:4-6, una kaalmeysto tafsiirka ibnu jariir dabari, sidoo kale ha ku fekero xadiithki Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye): "adducaa'u huwal cibaadah", oo tirmidi uu ka weriyay saxaabigi nucmaan ibn bashiir ahaa, macnihiisuna yahay: ducadu iyadaa cibaadadii ah, oo laga wado wallaahu aclam: waa qaybta ugu weyn. Haddii ay sugnaato in ducadu cibaada tahay, in duulal kale loola jeesto xukunkeedu kaama qarsoona.

Sidoo kale in dadki lugu tarbiyeeyo sunnadi Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) oo ay dad u hoggaansan noqdaan, isuna kaalmeysta wixii wanaag ah, xumida u diida si shareecada waafaqsan, macruufkana dadka fara. waxaanay awood u lahaynna aan u hanqal taagin.

Marka ay ummaddu hagaagto awoodna ay u yeeshaan in ay khilaafa raashida ah dhidibbada u aasaan fitna la'aan, dadka waagaa Alle gaarsiiyo ayaa waajibkaasu saaran yahay.

In guruubbo ummadda loo kala qaybiyo oo mid walba leeyahay khilaafa ayaan raadinayaa, inay khilaafadi saxda ahayd fogayso ma ogiye soo dhoweyn mayso.

waxaana marar badan dhacda in ay sabab u noqdaan dadka guruuubbaysiga u arka in xal lugu gaaro in ay meel nabad xoogaa ahi ay ka jirtay ay dhaafiyaan nabaddi, oo diinna aanay keenin duunyadina dadki dhaafiyaan.

khilaafa raashida ah waa howl ummadeed ee arrin qamaar gasha ma ahan oo ciyaalku sidi kubbaddi ugu ciyaaraan.

haddii aan oggolaanno iyadoon safar lugu jirin in guruubbo iyo xisbiyo siyaasadeed la dhiso diinba ha loogu magac daree, xuduudda ay leedahay maxay tahay? tuuladii kun qof ay ku noolayd haddii ay min boqol isu raacaan waa toban urur, oo u baahan duul kala dhex gala, marka ay tiradu sii badatana dhibku waa uu sii badanayaa.

haddii aan arrintaa furno ma maslaxaddi islaamka ayaan ka shaqaynay mise baabi'iisi, haddii aad adigu isu oggolaato urur sameysigase dadka kale wejiga aad ugu diideysaa muxuu yahay?

tan ku saabsan mashaayikhda aad i weydiisay ee soomaalida ah isku nooc ma ahan, sh cumar faaruuq xisbinnimo luguma yaqaan, labada wadaad ee kalase waa ka duwan yihiin. sunnada iyo salafinnimaduna ma ahan wax  qarsooma, oo waxay ka muuqataa qofka dhaqankiisa, hadalkiisa, tarbiyada uu tarbiyaynayo dadka, xiriirradiisa.

aad baanse u jeclaan lahaa in xarakada ictisaam ay qowl iyo ficilba ka beri noqoto fitanka iyo ictiqaadka ah in madaxda muslinka la takfiiriyo ama lala dagaallamo, arrin fiicanna ma ahan in ay iyagoo salafinnimo sheeganaya ka liitaan ashcarayida. Ibnutaymiyah waxa uu sheegay saddexda jiimood ee ashcariyada  ku jira, kalana ah: Irjaa', jabri, iyo qayb tajahum ah, laakiin waxa uu u qiray inaanay aamminsanayn in seef ummadda lala dhex galo ayadoo la leeyahay xumaan baa la suulinayaa, ibnutaymiyah wuxuu leeyahay: ashacariyadu arrintaa waxay ku raaceen ahluxadiithka (majmuucul fataawaa 6/55).

Nimanka suufiyada ah ee waayahan danbe dhex dabaashay dagaallada ahliga ah ashcarinnimadi miyay ka bexeen, oo muctazilo iyo khawaarij bay ka biyo cabbeen?. su'aashaa ha la weydiiyo.

Tan binlaadin ku saabsan waxaa igaga filan taladi sheekh bin baaz u jeediyay ee uu kaga dalbaday inuu ka waantoobo jidka xun, ee uu ku taagan yahay, iyo hadalki sheekh muqbil ee uu yiri ummaddan baas buu ku noqday ninkaasi.

waxaan ku dari lahaa uun ninkaasi jihaad ayuu sheegtaa, jihaadkana waxaan ognahay in ujeeddadiisu tahay in kalimadda Alle kor noqoto, waxaa is weydiin mudan dhaqdhaqaaqii Binlaadin karaamada iyo sharafta muslinku ka heleen xaggay ka muuqataa? ma afgaanistaan oo isagoo marti u ah uu kaga dhawaaqay inuu gaaladi duullaan ku yahay isagoon tabarteed hayn, raggii uu maganta u ahaana aan wargelin, oo ay ku waabariisteen diyaarado garaacaya iyo gantaalo badda looga soo tuurayo iyo ciidan lug ah oo ay la socdaan muslim badan oo xukunka la isku hayay.

mise waxaa cizzo iyo sharafi muslinka u korortay dhulki ay qaxootiga ku ahaayeen ee yurub iyo Amerika, oo wax walba oo u gaar ahaa shanta lala galay, oo muraaqabo iyo fatashaad dhinac walba ah lugu hayo.

annaga soomaaliya xoogaagii afkaartiisa iyo dadka raacsan naga soo gaaray berrin barwaaqo naguma furin, oo waxaan ka dhammaan la'nahay is khaarijin iyo is lacnadid, iyo adduunyadu inay nagu qososho sida xukunka loo jecel yahay oo aan waxba la isu oggolayn, maatina aan dan laga lahayn.

xikmad la soo guuriyay baa ahayd "min thimaarihim tacrifuunahum"

oo macnaheedu yahay qofki aad rabto in aad wax ka ogaato waxaa kaaga filan waxsoosaarkiisa.

Ninkaa Binlaadin ahi madaxda muslimiinta murtaddiin diinka ka baxsan ayuu ku xukumay, qaraxyada waddammada islaamka ka dhacay ayuu sheegtay inuu isagu dhiirri gelinta lahaa, dhallinyaraduna warkiisa qaateen, aadna waa uu u bogaadiyay kuwii ku dhintay qaraxyadi Riyaadh, iyo bariga afrika, wuxuu yiri waddammada islaamka dagaal halala galo oo xoog halagu beddelo, arrimahaasina waa jidki khawaarijta, ee ahlusunnah shaqo kuma leh.

aayadaha quraanka waxaa ku cad in sabar iyo yaqiin imaamnimo lugu gaaro.

cilmi xeel dheer, daacaddi oo lugu sabro, macsidana laga sabro, qadarka Alle loo dulqaato, ayaa loo baahan yahay, ninkaasi tiirki cilmiguna uma taagna, fitnadina kama sabrin, oo waa uu dhex dabaashay.

arrinta afgaanistaan iyo falastiin waxaa ila fiican inaad dib u dhigato.

Wassalaamucalaykum waraxmatullaah

# e- Calanka madow ee ay isticmalaan al shabaab ma sunnaa oo nabiga calanka dagaalada uu qadan jiray madow miyuu ahaa?.

***Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud***

Jawaab: Abuudaawuud iyo geyrkiiba waxay ka weriyeen jaabir: in calanka Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) uu ahaa caddaan maalintuu makka galay.

Sheikh Albaani wuxuu yiri xadiithku waa saxiix (saxiix abiidaawuud, Nr. 2592).

Waxaa kaloo abuudaawuud iyo geyrkiiba weriyeen in bandiiradda Rasuulka Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) ay ahayd mid madaw oo afar gees is la'eg ah, xarxarriiqimo cad cadna leh. Sheikh albaanina waa saxiix buu yiri marka laga reebo afargeeska.(saxiix abiidaawuud, Nr. 2591) .

Haddaba midabka cadi waa uu sugnaaday, madowga la sheegayna ma ahayn mid wada mugdi ah ee cadcaddaan baa ku jiray. Sharaxa saxiixu muslim waxaa ku yaal in raayadu ay tahay calanka yar, liwaaguna yahay kan weyn. Waxaana loogu tala galay in lugu aqoonsado meesha ninka madaxda ahi joogo si loogu soo hirto marki loo baahdo.

Haddaba waxaan halkaa ka fahamnay in marba si uu ahaa midabka calanku. Waxyaabaha Rasuulka Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) looga daydaana way badan yihiin, waxaase muhim ah in qofku caqiiddada iyo camalkaba hagaajiyo, muslinkuna ka nabadgalaan gacantiisa iyo carrabkiisaba.

Nimanka khawaarijta la yiraahdo, ee saxaaba badan gaalnimo ku xukumay, oo bidcada ay la yimaadeen qofka ku diida gaal baa tahay yiri, oo saxaabada ku khilaafay wax badan oo ka mid fasiraadda quraanka iyo xadiithka, Rasuulka Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu sheegay in ay bani'aadan suu u dhan yahay ay u xun yihiin, duul la dilana ay ugu liitaan.

Sidaasoo ay tahay wuxuu sheegay Rasuulka Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) in ay salaadda iyo soonka aad ugu dadaalaan, oo saxaabadii ayuu ku yiri: waad yaraysanaysaan salaaddiinna iyo soonkiinna iyo quraan akhriskiinnaba marka tooda la barbar dhigo, haddana wuxuu yiri: quraanka ayay akhrinayaan, kalxamahoodase ma dhaafo, oo hoos uma ridna.

Marka yaan lugu kadsoomin muuqaal, calanna lama barbar dhigi karo salaad, soon, quraan akhris, haddana dad ku dadaalay ayaa dhibkaa laga sheegay, qofku waa in uu naftiisa u baqaa.

Ubay ibn kacb wuxuu yiri: dhexdhexaadnimo ay sunno iyo dariiqii oo lugu joogo ku dheehan tahay ayaa ka wanaagsan dadaal badan oo aan sunnadi iyo jidki toosnaa waafaqsanayn.(fiiri: sharx usuul ictiqaad ahli sunnah, laalakaa'i 1:60)

Khawaarijtu waxay sheegteen in ay kitaabka Alle weyneynayaan, oo ay dabbaqaaddiisa dadka kula dirirayaan, shiicaduna waxay sheegatay in ay weyneeyaan aalu baytka, labada qolana Kama run sheegin waxa ay sheegteen. (Fiiri fataawada ibn taymiyah 13:210).

Wuxuu kaloo isla mujalladkaa ku sheegay bogga 243aad in qofki quraanka iyo xadiithka u fasirta si ka duwan tafsiirkii ay saxaabada iyo taabiciintu yaqaanneen, ninkaasi waa nin Allaah ku been abuurtay, aayadaha Allana ilxaad ku sameeyay, hadalkana ka leexiyay meeshiisii, arrintaasina waa furid la furaayo albaabka gaalnimada iyo mulxidnimada, arrintaasina waa arrin sidi qorraxdi oo kale ugu cad diinta oo aan shaki yarina ku jirin. Halkaas ayuu ku dhammaaday warka ibn taymiyyah.

Teeda kale xaggee lugu arkay muslin lala jihaadayo. Muslinka koodii la yimaada wax uu dil ku mutaysto, imaamka muslimiinta ayaa ku fuliya, haddii kale qof walba intuu qofka kale dilo ayuu leeyahay dil buu mutaystay, haddii aan madaxda looga danbeyn fitna aan joogsan baa ka dhalanaysa. (fiiri: usuuluddiin, abuumansuur al bagdaadi: 340, mukhtasarulfataawalmisriyyah, ibntaymiyyah:580). Sidoo kale kooxdii la timaadda wax ay ku mutaysato dagaal waxaa wax ka qabashadeeda iska leh imaamki muslimiinta, haddii kale kooxuhu waa ay is dhammeynayaan, mid walbaahi midda kale qiil bay u raadsanaysaa.qofkii aan Allaah ka cabsanaynna qiil ma waayo.(sharx saxiix muslim. Nawawi:2/25).

Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) wuxuu na baray in gaalada loola dagaallamayo in ay laa'ilaaha illallaahu yiraahdaan, salaaddana oogaan, sakadana bixiyaan, wuxuu yiri: haddii ay sidaa sameeyaan dhiiggooda iyo xoolahooduba waa ay naga reebban yihiin. Aayadaha iyo axaadiiththu waxay aad u adkeeyeen dhiigga muslinka in la daadiyo, waxayna sheegeen dambi ka weyni inaanu jirin marka shirkiga laga yimaaddo. Waxaa isweydiin mudan: yaa jihaadaya? Ma dowlad mise kooxo? Yaase lala jihaadayaa? Ma muslim mise gaalo? Gaalada lala dagaallamayaa ma

dhammaantood baa mise kii heshiis noo dhexeeyo kuma jiro? Dhulka uu jihaadku ka dhacayo ma kii muslinku degganaa baa oo ay Allaah ku caabudayeen, mise waa dhulka ay deggan yihiin dadka aan xeradaba soo gelin, wax heshiis ah oo noo dhexeeyana aanay jirin?

Jihaadku isaga soo bood ma ahan, wax baraka ahna luguma arag jihaadka shabaabka iyo ragga la midka ahi wadaan. Muslinku dullinnimo uun ayuu ka kororsaday. Haddaba inta aan laga hadlin calanka midabkiisa, ha laga hadlo su'aalahaas.

**[ Fiiro Gaar ah**: jawaabtaasi dhowr bilood ka hor ayay ahayd, hadda oo ay taariikhdu tahay 7/2/1431 hijriga, waafaqsanna 22/1/2010 waxaan ku dari lahaa: culimadu waa ay sheegeen in ay sunno tahay calanka jihaadka gaalada lugula jiro loo qaato, laakiin inti aan baarbaaray weli iima soo bixin iyagoo leh: midab hebel ayaa sunno ah, xukun aan lagaaga horreynna waa khatar, in magaalooyinka muslinku deggan yahay calan la suro, midabka uu doono ha yeeshee iyadana ma arag culimadi axaadiithta sharaxday mid ka mid ah oo waa sunno yiri, haddaba kuwa yiri calankeenna qofki diida sunnadi ayuu ka hor yimid, dagaal ayaana noo dhexeeya, waxaa iiga muuqata arrin aan fiicnayn oo khawaarijta laga sheegi jiray, ahna wax bannaan in ay xaaraan ka dhigaan, wax aan sunna ahaynna sunna ka dhigaan, wax wanaag ah xumaan laga dhigo, wax xunna wanaag laga dhigo, intabana xiriirin iyo goyn laga dhaliyo, gaaleysiin iyo qoor goynna lugu bannaysto. Kii khawaarij u horreeyay wuxuu eex ku sheegay qaybinti Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye), kuwii Cali uu la dagaallamayna waxay gaalnimo ka dhigeen wax bannaan oo ah in muslinki dirirsanaa la kala dhexgalo oo rag loo bixiyo kala xukuma].

## f- Xukunka islaami la raadinaayo maloo Mari karaa waxkasta oo xalaal iyo xaraanba ah taas waa kow.

**Mida kale shekhow haddii meeshii loo soo carari jiray culimadii iyo masaajidadii lagag cararo inteen u cararnaa, culimadii waxay noqdeen dhiig daadiyayaal, masaajidadii waxa laga dhigtay meel ciidan laga hago inteen aadnaa? .**
**Suaashan xamar ayaan ka soo diray daadir.**

***Waxaa ka jawaabay: Cismaan Macallin Maxamuud***

In wax lugu xukumo waxa Alle soo dejiyay darajooyin ayay kala leedahay:

1- mid qof walba looga baahan yahay, oo ah in qofku rumeeyo wixii khabar ah ee Alle iyo Rasuul noo sheegaan, wixii ay na faraanna aan fulinno inta la awoodo, wixii ay naga reebaanna aan ka joogsanno.

Diinta asalkeedi iyo faraceedi ayaa soo gelaya.

Inta ay dadku sharciga ka fulin karaan aad ayay u badan tahay, iyadoon dowlad lugu xirin.

Qofkii Alle iimaan qalbigiisa geliyay, islaannimadiisuna saxan tahay ku raalli noqon maayo wax aan ahayn xukunka Alle.

Haddaba xukunka Alle muxuu yahay?

Xukunka Alle waa uu ballaaran yahay, waxaana soo koobaya wixii Nebi Muxammad (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) Alla ku soo dejiyay, kaas ayay dadka waajib ku tahay in ay aqbalaan, dadka oo dhanna waxaa waajib ku ah in ay u xukuntamaan kitaabka iyo sunnada, oo dadku lama aanay imaan iimaankii waajibka ku ahaa haddaanay wixii ay isku khilaafaan uga danbeyn Rasuulka Alle (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye), sida ay tilmaantay aayadda 65aad ee suuratu nisaa'a

(فلا وربك لا يؤمنون حتى يحكموك فيما شجر بينهم ثم لا يجدوا في أنفسهم حرجاً مما قضيت ويسلِّموا تسليماً)

2- Mid saaran qofkii Alle awood siiyay ee ummad madax u ah waxaa waajib ku ah in uu dhexdooda ku xukumo wixi Alle soo dejiyay.

Hadduu ku xukmin waayana Allaa kula xisaabtama oo ciqaaba, ummaddina dhexdeeda ayaa Alle colaad dhigaa, iyadoo arrintaa lugu ciqaabayo, sida axaadiithtu caddeysay.

Haddaba qofkii wax xukuma oo aan wixi Alle soo dejiyay wax ku xukumin, balse wax kale wax ku xukuma, isagoo dad ka baqaya ama adduunyo ku iibsanaya, sheeganayana in waxa uu wax ku xukumay ay yihiin xaq iyo caddaalad qofkaasi diin shuqul kuma leh.

Ibnutaymiyyah wuxuu sheegay isagoo ka hadlaya waqtigii uu noolaa in dadku sharciga saddex waxyaabood ku sheegaan:

a- sharci munazzal ah (waa kii Alle soo dejiyay, waa kitaabki iyo sunnadi, dadka oo dhanna waajib ayay ku tahay in ay raacaan, ama madax ha noqdaan, ama qaalliyaal, ama sheekhyada dariiqooyinka, kuma jiro mid ay u furan tahay in uu ka baxo daacada Alle iyo tii Rasuulka "ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye").

b- Sharci mu'awwal ah (waa waxyaabaha ummaddu isku qabsato ee ijtihaadku ka furan yahay, qofkii qabsada wax ijtihaad ku bannaan yahay, luguma inkiro, dadkase waajib kuma wada ahan in ay warkiisa qaataan, haddaanu keenin xujo lama dhaafaan ah oo kitaabka iyo sunnada ku cad).

c- Sharci mubaddal ah (waa wixii markhaati beenaale warkii lugu sugo oo kale, ama jaahilnimo iyo dulmi ku dhisan, xaqi iyo caddaaladdina ka baxsan, iyadoo wax lugu xukumayo xukumki Alle waxaan ahayn, ama qofki la leeyahay qiro wax aan jirin si dad kale xaqood loo duudsiyo, iyadoo ay dhici karto in aanu isagu ku danbaabin qaalligii wax loo hoosaasiyo oo sida muuqata wax ku xukuma, illeen waxa qarsoon ma oga e). waxaad fiirisaa majmuucul fataawaa (35/396-397 iyadoo soo gaabini ku jirto).

Haddaba su'aasha aad weydiisaay ee aad leedahay: " Xukunka islaami la raadinaayo maloo Mari karaa waxkasta oo xalaal iyo xaraanba ah ", waxay jawaabtu noqonaysaa:

Islaamku ma yaqaanno warkii siyaasigii talyaaniga ahaa ee laga soo xigto in uu yiri: wax walba waan u marayaa si aan ujeedkayga u gaaro.

Islaamku wuxuu yaqaannaa in waxa la tiigsanayo iyo hadaf ku ay yihiin wax sharciga waafaqsan, waddada loo marayana waa in sharcigu oggol yahay, labaduba waa in ay xaqa waafaqsan yihiin.

Xaaladaha muslimiintu waa ay kala duwan yihiin, waqti wanaagsan waa la soo maray, waqtiya xunna waa ay soo mareen.

Haddii xukunki islaamka wax ka mid ah la khilaafo si sharciga waafaqsan ayaa loo daweeyaa, waa in la caddeeyaa waxani in ay munkar yihiin sharcigi khilaafsan, oo dadki xujada lugu oogo, dowladdi Alla dhulka u makaniyo ayay waajib ku tahay in ay ka hortagto munkarkaa, haddiise ay ka dhalanayso dowladnimadi oo baaba'da, dib baa loo dhigayaa, iyada oo wax yar la saxayo ma ahan in wixi weynaa baaba'ooda sabab loo noqdo. Dowladnimada waxaa ku badbaada inta badan nafti iyo maalki iyo wax badan oo diintii ka mid ah, oo dadki si nabad ah ayay Alla u cabbudi karaan, qofkiise naftiisa, xoolihiisa, iyo sharaftiisaba u baqaya cibaadadi ma macaansan karo, wanaag fara badanina wuu seegaa.

Haddii kuwa madaxda ahi ay iyagu ka seexdaan waajibki saarnaa, aaneyse u diideyn dadki arrimuhu ka go'een in ay khaladka saxaan waa ay saxayaan.

Haddiise khaladki aan la sixi karin in madaxdi muslinka ahayd lala dagaallamo ma ogiye, lalama dagaallamo, Rasuulku "ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye" waa uu diiday in lala dagaallamo inta ay muslin yihiin tukanayaanna, isagoo ku sheegay in ay dadki dhib u geysanayaan, xoolahoodi iyo jirkoodiba, oo ay na neceb yihiin annana aan neceb nahay, markii ay yiraahdeen saxaabadu ma la dagaallannaa wuxuu ku yiri: maya, intaba ay dhexdiinna salaadda ku oogayaan. War hooy qofkiinnii nin uu madaxweyne u noqdo, ee arka ninki madaxda ahaa oo macsi la imaanaya, ha kahsado macsidiisa, laakiin yaanu ka bixin daacaddi.(muslim baa weriyay xadiithkaa, nr.1855).

Culimadi sunnadu waxay caqaa'idkooda ku sheegeen in aanay ka mid ahayn munkarki oo gacanta lugu zuuliyo in madaxdi hub loo qaato, markaa mas'aladi way ka baxaysaa munkar inkirid, la dagaallanka madaxdu ma ahan wax iska furan. Waxaad fiirisaa al amru bilmacruuf wanahyu canilmunkar oo khallaal leeyahay:32-33 isagoo warkaa imaam Axmad ka weriyay. Waxaad kale oo aad fiirisaa sharxusunna-barbahaari, bogga 50aad.

In madaxda muslimiinta hub loo qaato waxay caqiiddo u tahay khawaarij iyo muctazilo, arrin ahlusunnuhu yaqaannaan ma ahan. Fiiri fataawaha ibntaymiyah 28/128.

Haddaba in urur loo aasaaso shareecadi ayaan dabbaqaynaa, macnaha ku hoos jirana uu yahay dowladdii muslinka ahayd ee markaa jirtay ayaan xukunka ka tuuraynaa, oo annagaa ku fariisanayna, waxaan u maleynayaa in ay soo geleyso sharcigi mubaddalka ahaa, maxaa yeelay way sahlan tahay in qof kasta ceeb loo helo, haddii la yiraahdo dagaal ha lugu saxo, wax joogsanaya ma ahan, oo mid walba oo timaad duul baa dhaliilaya oo dhiiggooda bannaysanaya, markii ay iyagu ku fariistaanna kuwa kale ayaa dhaliilaya oo iyana dhiiggooda bannaysanaya, waa fitno aan dhammaaneyn.

Cibro waxaa noogu filan wixii dhacay taariikhihi la soo dhaafay, intee dhiig badan la soo daadshay, ka dibna aan waxba laga qaban munkarki la lahaa waxaa loo istaagay in meesha laga wareejiyo.

Xukunka fulin la fulin waayay kaliya luguma gaaloobo, ee saddex mar ayuu gaalnimo keenaa, waxaana noo kala dhigdhigay Cabdirraxmaan al mucallimi, caalimkii yamaneed oo culimada sunnada iyo caqiiddada looga danbeeyo qarnigan ka mid ahaa, waxa uu yiri:

**والحكم بغير ما أنزل الله على وجوه:**

**الأول: أن يقضي به زاعماً أنه هو الذي أنزل الله مع علمه بكذبه ، كما كان اليهود يقضون في الزنا بالجلد والتحميم زاعمين أن ذلك هو حكم شريعتهم كاتمين لما في شريعتهم من أَنَّ حُكْمَهُ الرَّجْمُ .**

Saddexda jeer ee ay gaalnimada keeneyso in wax lugu xukumo wax khilaafsan wixi Alle soo dejiyay waa kuwan:

Kan koowaad: in uu wax ku xukumo wax khilaafsan wixi Alle soo dejiyay misana yiraahdo kani waa wixii Alle soo dejiyay, isaga oo is og in uu been sheegayo, sidi yuhuuddu ay u xukumeen in qofki sineysta isagoo guur soo maray xukunkiisu yahay in la karbaasho, wejigana laga madoobeeyo, iyagoo sheeganaya in xukunki shareecadoodu uu sidaa qabo, iyagoo qarinaya wixi sharcigoodu qabay oo ahaa in dhagax lugu dilo (sida ku cad xadiithki ibni cumar ee bukhaari"6841" iyo muslim"1699" weriyeen).

**الثاني**: أن يقضي به زاعماً أنه حق وعدل مع علمه واعترافه بأنه خلاف ما أنزل الله ، كأن يقضي مَنْ يدَّعي الإسلام بأن ميراث الأنثى من أبيها كميراث الذكر سواء .

Tan labaad: in uu sheegto kan khilaafay xukunka Alle in guddoonkiisu uu xaq iyo caddaalad yahay, isagoo og, qirsanna in waxa uu wax ku xukumay ay khilaafsan yihiin wixii Alle soo dejiyay, tusaale ahaan in qof islaam sheeganaya uu xukumo in gabadha iyo wiilku aabbahood si siman wax uga dhaxlaan, oo aan la kala badin karin.

**الثالث**: أن يقضي برأيه ويزعمه حقاً وعدلاً ولا يبالي أوافق الشرع أم خالفه .

Tan saddexaad: in wixii uu maskaxdiisa ka maago intuu wax ku xukmiyo haddana yiraahdo waa xaq iyo caddaalad, isagoo ay isugu mid tahay waxa uu xukumay in ay sharciga waafaqaan iyo in ay ka hor yimaadaan.

Haddaba haddii la sii macneeyo sida ay gaalnimada u keentay waa sidan:

**فالأول**: كَذِبٌ على الله كما هو ظاهر، وتكذيب بآيات الله التي كتمها؛ لأنه يجحد أن ما قضت به هو حكم الله ، فإن استحلّ فِعْلَه ففي ذلك كذب وتكذيب آخر .

Kan koowaad: waa Alle oo lugu been abuurtay, sida iska muuqata, sidoo kalena waa beenin la beeniyay aayadihi Alle ee uu qariyay. Maxaa yeelay wuxuu dafirsan yahay in waxa ay aayaduhu xukumeen uu yahay xukunki Alle, hadduu banneysto waxa uu sameynayo waxaa meesha imaanaya beenin cusub iyo in Alle been laga sheego oo tii hore ka dheeraada.

**وأما الثاني والثالث**: " فتكذيب بآيات الله عز وجل كما هو ظاهر ، وفيها كذب على الله أيضاً من جهة وصفه بما لا يليق به من الحكم بما ليس بعدلٍ ولا حقٍّ ، ومن جهة إثبات شريك معه يشرع الأحكام فتكون طاعته حقاً وعدلاً بدون إذنٍ من الله " .

Tan labaad iyo tan saddexaadu: waa beenin aayadihi Alle la beeninayo sida iska muuqata, waxaa kale oo ku jira Alle oo laga been sheegay oo lugu tilmaamay wax aan u qalmin oo ah in uu xukumay wax caddaaladdi iyo xaqiba ka baxsan.

Sidoo kale beenta Alle laga sheegay waxay ka imanaysaa sugidda la sugay ku Alle wax la wadaaga, oo inta uu sharci dejiyo ku raaciddiisu noqonayso xaq iyo caddaalad, iyada oo aan Alle idan laga heysan.

**اه من كتاب رفع الاشتباه للمعلمي ١/٤٩٩.**

**Tan aad tiri:"**Mida kale shekhow hadii messhii loo soo carari jiray culimadii iyo masaajidadii lagag cararo inteen u cararnaa, culimadii waxay noqdeen dhiig daadiyayala masaajidadii waxa laga dhigtay meel cidan laga hago inteen aadnaa"

Jawaabtu waxay tahay: carabtu waxay ku maahmaahdaa: **"قد استسمنت ذا ورم"** oo macnaheedu yahay: qof jirro la bararan ayaad u qaadatay in uu cayilan yahay.

Waxaan uga gol leeyahay, armaad dad aan culima ahayn culima u qaadatay.

Soomaalida waxaa dhaqan u ah in qofki cibaadaatka ku dadaala, danbiyada waaweyn ee muuqdana iska dhowra in ay ugu yeeraan culimo. Oo caalimka iyo wadaadka mar marbaa isku mid laga dhigaa, waxaanan u maleynayaa in mushkiladdu halkaas ka jirto.

Haddii arrinku sida aad u sheegeyso yahay, oo dhiiggana ay xaqdarro ku daadinayaan, masaajiddina dagaalka ka hagayaan, waa culimo lama dhihi karo. Xadiithki saxiixa ahaa wuxuu ahaa

**" إن الله لا يقبض العلم انتزاعاً ينتزعه من صدور العلماء، ولكن يقبض العلم بقبض العلماء، حتى إذا لم يبق عالم اتخذ الناس رؤساء جهالاً فسئلوا فأفتوا بغير علم فضلوا وأضلوا" .**

Alle cilmiga kuma qaado ka siibid uu ka siibayo qalbiga dadka, wuxuuse cilmiga ku qaadaa qaadidda culimada, marka ay culimadu dhammaato ayay dadku dad aan waxba garanayn caleema saartaan oo wax weydiiyaan, markaasay cilmi la'aan iska jawaabaan, markaasay dhumaan, waxna dhumiyaan.

Xadiithku wuxuu tilmaamayaa in dadka looga yimaado dhinaca dadka aan wax aqoon.

Shaadibi wuxuu leeyahay: nin cilmiga ku xeeldheeri bidco ma billowdo, waxayse bidcadu ka dhacdaa qofki aan cagtiisu ku sugnayn cilmigaa uu bidcada ku dhex sameeyay.(fiiri kitaabkiisa ictisaam 1/192)

Abuubakr adarduushi mar uu xadiithkan ka hadlayey wuxuu yiri:

Cumar ibn khaddaab ayaa macnahan si fiican u sii iftiimiyay, oo wuxuu yiri: qof aamin ahi wax ma khiyaano, ee waxaa wax lugu ammaaneystay qof aan aamin ahayn, markaas ayuu wax khiyaanay.

Darduushi wuxuu ku daba xijiyay: annana waxaan leennahay: caalim dhab ahi weligii bidcoole ma noqon, waxaase wax la weydiiyay qof aan caalim ahayn markaas ayuu isna lumay dadkina lumiyay.

Tan masaajidda ku saabsanna waxaan leeyahay: masaajidda looma dhisin in dhiig lugu daadiyo, axaadiithtuna waa ay diidday in xuduudda masaajidda lugu oogo. Sida ku cad qisadi maaciz ee uu yiri: "idhabuu bihi farjumuuhu", cumar iyo ibnumascuud iyo geyrkood ba saasay qabeen. Fiiri fatxulbaariga (13/157).

Masaajidda waxaa loo dhisay salaad, xusid Alle, Barashada diinta, iwm.